**Somali Library**

Buugaan iyo Buugaag kale ee
ku qoran Luqadaada Hooyo ee **Af-Soomaaliga**
waxaad ka heleysaa

# Somali Library

Fadlan Booqo Boga Telegram-ka
https://t.me/Somalilibrary

liibaanwaasuge

# AQOONDARO WAA

## UNACAB JACAYL

# ARAR

***

In kastoo sheekadanu tahay mid la qurxiyey lana xariiriyey qaarkeed, hase ahaatee waa mid run ah oo ka dhacday dalka Soomaaliyeed, magaalada Xiis oo bad yarada Cadmeed ku taalla gobolka Sanaagna ka tirsan markay qiyaastii taariikhdu ahayd 1913kii ilaa 1922kii waxayna ku saabsan tahay jacayl ay gabar la dhihi jirey Cawrala Barre jeclaatay ninka la oran jirey Calimaax.

Calimaax wuxuu ahaa markaas afartan jir xaas leh, wuxuuna ahaa nin garaad fiican leh gabayaana ah, waxse nasiib darro ahayd inaanu sida wax loo akhriyo ama loo qoro aqoon, taasoo ay ka dhasheen dhibaatooyin waaweyn oo ka gaaray xaashadihii gabayada jecaylka sirta ahaa oo ay u dirtay Cawrali.

Haddaba, in kastoo sheekadani salkeedu yahay jacaylkaas dhex maray Cawrala iyo Calimaax, ula jeedooyinka ku jiraa loogana dan leeyahay, oo ay wax ka tusaalaynaysaa waa waxyaalaha hoos ku qoran.

- b) Tan u horraysa, waxay wax ka tusaalaynaysaa dhibaatooyinka, danqaaraha iyo waxyeellada ay dadka u leeyihiin wax akhris la’aanta iyo wax qoris la’aantu.

- t) Tan labaad sheekadanu, waxay tusaalaynaysaa heerkay haweenka Soomaaliyeed kaga jireen dhaqanka iyo murtida Soomaaliyeed, isla markaasna waxay muujinaysaa qaybtey jacaylka ka qaateen beryihii hore.
- j) Tan saddexaad oo ah tan ugu qaaya weyn, waxay daaha ka qaadaysaa ruuxa waddaniga ah oo dalkiisa kalgacal u qabaa inaanu ahayn kan dib uga laabma ama ka cataaba hadduu dhibaatooyin iyo silic kala kulmo daryeelidda, ilaalinta xornimada, iyo gobannimada dalkiisa.
- x) Tan afraad waxay wax ka tusaalaynaysaa samaha sinnaantu leedahay, iyo saymihii sinnaan la'aantii ka dhexaysey raggiyo haweenkii hore. Waxay kaloo isla mar ahaantii wax ka tusaalaynaysaa taariikhda, dhaqanka qotada dheer iyo caadooyinkii ummadda Soomaaliyeed.
- Kh) Tan shanaad waxay wax ka muujinaysaa joqoraafiga iyo taariikhda gobolkaas Sanaag oo ah gobolkay ku dhasheen Cawrala iyo Calimaax, isla markaasna waxay tusaalaynaysaa faa'iidooyinka kalluunka cuniddiisu u leedahay dadka.
- d) Tan lixaad waxay tusaalaynaysaa in haasaawaha iyo muranka lagu murmo af Soomaaliga ay lagama maarmaan tahay in murti, gabay, saar, geeraar, hees, guurow, jiifto, shirib iyo maahmaaho ay saldhig u ahaadaan, haddiise aanay murtidaasi ku jirin taageeraynna, wax kastoo lagu hadlo, fara kastana hadalku ha

lahaadee, inuu qiimihiisu yar yahay. Sidaas darteed, waxay ka fursanwaa noqon weydey, inay sheekadanu gabay, maahmaaho iyo heeso ku dhisnaato, oo ay meelo badan ka soo galaan.

Haddaba, inkastoo berigaas magac heello la yiraahdo aanu jirin, hase ahaatee waxa jirey heeso la sansaan ahaa, laakiinse ay dhihiddoodu iyo habka ku luuqayntoodu ka duwaneyd heellooyinka haatan jooga. Markaas heesaha buuggan ku qoran iyagoo ah heesihii berigaas jirey baa misna sidii heesaha maanta jooga loogu luuqayn karayaa.

***

# AFEEF

Ugu dambaystii, iyadoo sheekadani tahay mid run ah, hase ahaatee sidaan hore ugu sheegay aan qaarkeed xarxariiriyey, khaas ahaanna qaarkeeda dambe dheehdheehay, si ay taabba gal u noqoto, waxaa markaas iga afeef ah in haddii innaba wax dhaliil iyo daldalool ahi ka muuqdaan habka iyo hannaanka dhismaheedu yahay ay sabab u tahay afkeennoo aan hore u qornaan jirin, oo markaas aan hab la raaco qorriinkiisu lahayn hadda ka hor. Iyadoo ay misana dhibaatooinkaasi jiraan, saas looga harimaayo, waayo waxaa Soomaalidu ku maahmaahdaa “canaan ka yaab reer ma doojiyo”.

Midda kale dadka magacyadoodu buuggan ku qoran yihiin qaybna kaga jira sheekadan, laakiinse aanay wehelin Cawrala iyo Calimaax iyo raga gabayadoodii xigashada loo soo qaatay, waa magacyo dad dedan oo lagu dhisay sheekadan.

***

# KICITAANKII CAWRALA IYO CALIMAAX

> …….. Waxaan ahay haddii runtii lagu arooro Cawrala Barre, oo ah middaan sheegay oo isheedu iyo laabteedu ku raaceen aragtideedii u horraysey, oo aad shaki la'aan nafteeda iyo ruuxeeda leedahay, aadanse adigu ogeyn, iyaduse had iyo jeer habeen iyo dharaar, hurdiyo soojeed kugu hamiyeysa oo Jacaylkaaga iyo Kalgacalkaaga oo jiidhka iyo lafaha galay aawadood oon iyo anfaco diiddey.

Cawrala Barre waxay ku dhalatay markay taariikhdu qiyaastii ahayd 1893kii dalka Soomaaliyeed, magaalada Xiis oo bad yarada Cadmeed ku taalla gobolka Sanaagna ka tirsan. In kastoo yaraanteedii ay magaalada joogi jirtey inta jiilaalka ah, hase ahaatee waxay badsan jirtey miyiga halkaasoo aabbaheed ku dhaqan jirey xoolo aan badnayn.

Sida la ogsoon yahay magaalad Xiis waxay ku hoos taal buuraha Caleed, buurihii Golisna loo yaqaanno, waxayna is hayaan buurahaasi ilaa Karinboosaaso iyo ilaa Boorama haddii xagga bogox loo raaco, halkaasoo ay misana sii dhereran yihiin ilaa Harar. Xagga barina haddii laga bilaabo Karinboosaaso waxay is hayaan ilaa Baargaal, waxaana loo yaqaan wixii Karin bari ka xiga buuraha Calmaskaad.

Haddaba, buurta Surad la yiraahdo ee Xiis, dusheeda ah waa buurta, buuraha dalka Soomaaliyeed ugu dheer waana 2800 Mt. Waxayna ka mid tahay buurihii caanka ahaa oo ilaa Nebi Ciise dhalashadiisii ka hor laga guran jirey Moxorka, Mayddiga, Falaxfalaxda, Murkudda iyo faleen badan oo udgoon.

Sida taariikhdu sheegayso waxaa meelaha iman jirey Faraacinadii, oo uduggaas qaayaha weyn leh uga guran jirey ahraamta iyo guryahay wax ku caabudi jireen. Faraacinadii iyo Masaaridii hore ee adduunka ilbaxnimadoodu ugu horeeysey aad bay u iman jireen gobolkaas Sanaag, raadad bandanna way kaga tageen, waxayna u bixiyeen dalkeenna dalkii Moxorka iyo Mayddiga, ama (Puntland) sababtoo ahayd uduggaas iyo carfoonkaas ayaan adduunyada meel kale laga heli jirin. Buurtaas Surad ee gobolkaas ku taal waxay ka mid tahay meelaha dalka Soomaaliyeed ugu roob badan.

Waxaa kaloo kabaxa buurahaas dhir badan oo kumanyaal jaad ah, oo ay ka mid yihiin Dhosoqa, Xiiska, Deyibka, Mooliga, Hareeriga, Shoyga IWM. Buurtaas Surad iyo buurahaas Caleed oo la xiriira wax la sifayn karo quruxdoodu iyo qiimahoodu ma'aha, waxse gabay ku sifeeyey gabayaaga caanka ah Xaaji Aadan Axmed (Afqallooc) ee Ceerigaabo deggan keligiisna la oran karo waa ka nool yahay raggii hore ee gabayaaga ahaa.

Wuxuu yiri,

Waa meel malka ah oo biyiyo buur madowba lehe
Marmar weeye dhagaxeedu iyo muunad gooniya'e
Miyaad dooxa ah bay leedahay, oo miro ka beermaane
Mandarka iyo jamaalka baad Libnaan ugu malaysaaye
Manaakha iyo hawada waxay ka tahay Mawsalka Ciraaqe
Kolkaad madaxa Surudeed tagtiyo meesha ugu taagan
Badda waxa maraayoo dhan baa, kuu muraayad ahe,
Madfaca laga ridaa wuxuu tagaa, kuman masaafoode
Arraweelo meeshay degtey, iyo muluggii Geylweyte
Iyo ma'aasiir ku jira, moodkii la helaayey,
Maanla'aha iyo taallooyinkaad, aqalka moodeysid,
Meelihii kinsiga lagu qarshay bay, maangadood tahaye,
Madduuno iyo god qorane baa ninkii, marayba yaabaaye,
Muutasaha iyo Daalo waa lagu murqaamaaye,
Ma'yey baa ka da'a goortay tahay, milayga jiilaale,
Daruurtoo mahaja soo rogatiyo, waqayga meyl gaaray,
Sida mawjadaha iyo doonyaha bay, mar isu jiiraane
Dhirtana qaarba midba leeyahay iyo, man iyo awraaqe,
Maawered in lagu daadiyey baad udugga mooddaaye,
Min aroos sidaad soo gashay iyo, mawledkii nebiga,
Miski baa ka urah kaynta iyo, malafka geedaha'e
Shimbiraha mukhtalifka u ciya ee midiba hees qaaddo

Oo midabba kala goonniya oo, cadad malyuun gaara
Mawda iyo siyaaxa baad arday iyo macallin mooddaaye,
Qollay ku madadaalisiyo Murada badane
Goortuu Gobyaan waa murdee, goonni miranaayo,
Uu Gorod miyuusigga tumoo, Galow ku maaweesho
Oo Marisku kuu soo warramo meesha waxa yaalla,
Aad Raha madiixiisa iyo, maqasho Daa'uuska

Adiga iyo naftaadaa murmah, oon doonin meel kale'".

***

Haddaba, Cawrali waxay yaraanteedii ku barbaartay dhulka buurahaas, dhirtaas, shimbirahaas iyo quruxdaas leh, oo gabaygaas ku sifaysan. Cawrali waxay ahayd kuna tilmaannayd gabar aan meel laga saluugo lahayn dhan kastaba ha ahaatee, midabkeeduna wuxuu ahaa midabka midabada ugu wanaagsan oo maarriin dhalaal casaan raac ah. Jooggeedu wuxuu ahaa dherer dhexe oo dhex yar, oo tima sayn yalax ahi garbaha laba taako hoos uga degeen.

Waxaa la yaab iyo amakaag ahaa indhaheeda cadcad oo kaah adeenla ahaa, wiilkooduna madoobaa, suuniyaheeduna dherer intey ka qabeen sanqaroorkeeda dheer salkiisa ayey ku soo arooreen. Cawrala qosolkeedu wuxuu ahaa had iyo jeer dhool ka qosol, oo debnaheeda deebta ah aayar furta, oo markaas in yar muujisa ilkaheeda caddaan sadafka ah ilaa dhoolaheeda dhuudhuuban barbar ka muuqdaan. Intaas waxaa u raacay labadeed kub oo laba buuxsin ahaa. Haddii daacad loo tilmaamana gacmaheeda garaaraha lahaa markay ku laafyooto ruux la quuro mey ahayn, goroddana waxay ku lahayd kuna wareegsanaa caabbaadhyo haddii la tiriyo afar meeris ahaa. Waxaana la oran karaa quruxdeedu waxay ahayd waxaan la arag lana maqal. Dharqaadashadeeduna dhuda wareeg abid kama yeelan jirine hab iyo hannaan bey u xiran jirtey una xarragoon jirtey.

Magaalada Cadmeed bey muddo shan sannadood ah ka baran jirtey quraanka iyo af Carbeedka halkaasoo ay heer fiican ka gaartey aqoonta wax akhriska iyo wax qoridda.

Waxay la walaal ahayd wiil la oran jirey Dalmar iyo laba gabdhood oo ay midna ka yarayd midna ka weyneyd. Hooyadeed iyo aabbedeedna waxay ku noolaayeen magaalada Xiis iyo miyigeeda oo ah buuraha ka sarreeya. Aabbeheed Barre wuxuu had iyo jeer Cawrala ku faanin jirey uguna ducayn jirey muddeecnimadeeda iyo dheganugaylkeeda, in kastoo mar-marka qaarkood waxay damacdo ma' ahe wax kale aanay yeeli jirin.
Isla markaas, Calimaax wuxuu la walaal ahaa wiil keliya iyo laba gabdhood, wuxuuna ku dhashay kuna barbaaray magaalada
Laasqoray oo Xiis xagga bari ka xigta una jirta qiyaastii 152 Km. Magaaladaa isla iyada ah waxay ku hoos taal buuraha Calmadow oo ay isku xiriir yihiin Surad iyo Daalo, sidaas daraadeed xagga quruxda iyo dhirta ka baxda waa isku sansaan, inkastoo buurahaas Laasqoray ay hoos timaaddo marka oogo laga soo bilaabo ilaa xeeb ay u kala baxaan heerarka ah Raacin, Arooro, Cayow, Jarcaleed, Madar, Ragar, Gadoob iyo Macagta oo ah halka buuruhu ku dhammaadaan.

Haddaba, dhulkaas buurahaas leh, ayuu yaraantiisii ku kicitimay, waxaana kaloo jirtey inuu in badan la socon jirey bulsha fardood

oo halkaas sida muuqata uu aad bulshay rag iyo haasaawe yaqaana ku noqday. Muddo dabadeed markuu gaashaan qaad noqday baduhuu galay oo ku ilbaxay, doonyahana wadiddooda iyo maamulkooda ka gaaray heer sare.

# SAFARKII DOONNIDA IYO KULANKII CAWRALA IYO CALIMAAX

Iyagoo sida muuqata, ay kicitaankoodii, noloshoodii, iyo dhulkay ku soo koreen kuna barbaareen Cawrala iyo Calimaax isku mid ahaayeen, ayey doonni ka soo wada raaceen magaalada Cadmeed, isagoo Calina dooyo Daraawiisheed u tegey, Iyana ay ka soo xagaa baxday magaaladaas.

Doonnidaas oo la oran jirey SUBXAAN ayaa waxay ka soo shiraaqatay makhribkii marsada Cadmeed markay taariikhdu ahayd 25 kii Maarso 1915 kii, waxaa doonnida la socdey 15 rakaab ah, oy 12 tahay rag, saddexna haween iyo 20 ah badmaaxyadii doonnida ka shaqaynaayey. Sidey caadadu ahayd 3 (saddexdii) haween waxaa loo gogley huuriga dushiisii oo halka ragga rakaabka ahi fadhiyeen saddex talloobo u jirtey.

Habbenkaas hore waxaa jirey dayax shan iyo tobnaad ah cirkuna waa cusbaa oo daruuraha gudgude sansaantoodaa munqanaysey oo labadii shiraacba waa buuxeen, hadbase doonnidu waa muraamaynaysey waana kordhinaysey muraanmenteeda markay badweynta hore ugu soo martaba.

Markay abbaara toddobadii habeennimo ahayd oo suqayariintii ay cashadii bixiyeen ayaa ninka la yiraahdo Calimaax haasaawe

bilaabay oo daandaansaday nin la oran jirey Nuur Ciise oo rakaabka ka mid ahaa, wuxuu ku yiri, "Nuuroow waadigaa wareeree maxaa badaan baas ku soo mariyey? Maad reerkaagii iyo Guudmanaa iska joogtid oo saaqa iyo haameeshaadii boqollaalka ahaa iskaga maashid. Haddaan adiga ahay weynaan badahan jaan kuma soo galeen oo hadba intaan doonnida jenbigeeda qabsado aa! aa! Aa! ma iraadheen. Kulase yaabi maayoo waxaa danqaarahaas ku soo mariyey arrad iyo gaajo, ee maxaad Cadan sooryo ka soo heshay, immisa mohoradood iyo iskujoog baad reerkii u siddaa waadigii wiilkii habar wadaaggaa dhalay wiilkiisii wiilkuu dhalay u tegeye?"

Nuur baa markaas wuxuu ku wareer gooyey hadalkii Calimaax oo yiri, "Caliyow miyaadan ogeyn inaad tahay mulxish reer magaala ah sidee baad nin reer miyi ah oo anoo kale ah wax uga shegi kartaa, miyaadse wiil yar oo gaashaan qaad ah, miyina ku kacay fartiisa guddaa. Allahayow yaa hayaan ama xoola kaliil hogad oon jooga ku yiraahda aroori, ha la bartee miigganaantaada iyo adkaysan waxaad leedahay. Halkaad reer miyiga gaajo iyo arrad ku caydayna waxaan kaa iri, miyaadan ogeyn magaalada inay xarragadeedu iyo wanaaggeedu tahay xoolaha iyo oontooda miyiga ka imanaya, Midda kale miyaadan maqal gabayga Sayidku tiriyey waadigii noo sheeganaayey Daraawiish eh?

Magaalada masruufkiyo dharka, laga muraadeysto,
Mushmushaaxa iyo biicu, waa moodka soo dega'e, Miyigaba
haddii laga xiraa, mawdku ka adeegye.

Naakhuudihii doonnida oo la oran jirey Shirdoon Sugulle ayaa haasaawihii isagoo taageeraaya Nuur Ciise soo dhex galay, wuxuuna yiri, "Caliyow maad iska deysid Nuur iyo reer miyiga faallihiisa, sababtoo ah waxaan qabaa inaadan Nuur hadal la ekaynayn oo uu gabayo iyo maahmaaho kugu hafinaayo".

Nin kale oo afraad lana oran jirey, Magan ayaa hadalkii qaatoo yiri, "Nuur iyo Naakhuudow waxaan idin leeyahay dad aan weligood isgaarayn ha siminina, waayo ninka reer magaalaha ahi wuxuu ninka reer miyiga ah u jiraa inta cirka iyo dhulku isu jiraan, ee hays daalinnina. Reer magaalaha runta ahi inta badan dugsuu galaa oo barta Quraanka iyo diinka, xaaraanta iyo xalaashana waa kala yaqaan dadkaana hadba ninkay saaxiib yihiin ayaa ugu sokeeya. War miyaanu ahayn reer miyigu kan geela dhaca oo anay xalaasha iyo boolidu u kala soocnayn, kufsadana hablaha markay meel dagan ka helaan, markay aradaanna dhuugu hugoodu yahay?

Ragga rakaabka ahaa iyo meesha habluhu fadhiyeen wax yar oo layska maqalo ayay isu jiren oo intii haasaawuhu soconaayeyna habluhu dhegtey ka maalayeen hadalka.

Cawrala iyo Calimaaxna marmar bay indhoodu kulmayeen sababtoo ah dayax shan iyo tobnaad bay ahayd, markii kulankaasi dhacana Cawrali intay xishooto oo hoos u jeensato ayey aayar gacanteeda midig ku soo hullaabanaysey malkhabaddeedii milmilka xariirta ahayd oo labada fool ku qabanaysey.

Mar labaad baa Calimaax markaas hadalkii, halkii ka qaaday oo wuxuu yiri “sida muuqata waxaa Nuur iyo Naakhuuduhu iyo reer miyoo dhammi qabaan in reer magaaluhu aanu murtida iyo gabayga aqoon haba yaraatee, lana ekayn karin af Soomaaliga reer miyiga. Haddaba, caawa iskeen siiya, oo weertaydan maqla”.

Wuxuu yiri.

Walle daacuflow reer miyaan, doocna garanaynin,
Dab la shiday aroortii hadduu, daamanka is dhaafsho,
Doqonnimo waa wuxuu cadkiis, doc uga muujaaye,

Haddi doog ilaah shubo, oo duni barwaaqowdo, Oo
doobi caanaha riyaha looga dalaf siiyo,
Oo rodol uu doondoon ku helay, uga dambaysiiyo, Isagiyo
duqdiisii markaas, dawlad la is moodye,
Damdamtiyo hangoolkii ma jiroo, diriri maayaane,
Maantaas ninkii dan u lahow, daaso hadalkaaga".

Filidda aan la fileyn in Calimaax si degdeg ah oo muddadaas gaaban ah ku tiriyo tixdaas qaayaha leh oo uu reer miyiga ku faalleeyey ayaa raggiina u sacbiyeen murwadii iyo hablihiina mashxarad dhegaha ku dillaacsheen wixii doonnida ku jirey, markasaa suqayariintii soo dejiyeen shah loogu tala galay haasaawaha habeenkaas oo hayl, xawaash iyo qorfe leh si loogu hambalyeeyo Cali madantuu sida wacan uga soo baxay. Cawralaa is hayn weydey oo ku tiri hablihii, "hah! hah! Afku kuma go'oh oo caano geel afkaaga lagu qabay ar ninku gabayga heli ogaa, heedheh galabtaan markuu doonnida soo fuulayey oo uu cagta soo saaray Calimaax isha geliyey inuu yahay diricdiric dhalay oo quruxdiisa qiima ku darsaday".

Waxay kaloo raacisey hadalkeedii, "anigu reer miyiga iyo wixii ku salle waan necbahay sababtoo ah, hadda aabbahay wuxuu ii soo dhoofshey nin reer miyi ah oo geel badan leh walaashayna ka dhimatay oo wax allaale wax uu yaqaan aanay jirin, sida loo

seexdana haba yaraatee aan garanayn. Gabaygaas caawa Calimaax tiriyeyna oo damdamta iyo hangoolkay la dhacaan ku sheegay wuu i sii nacsiiyey reer miyi iyo wixii ku salleba.”

Murwadii Saluuglaa ku tiri, “soo Cawralaay aabbahaa haddaad diiddid ninkaad sheegtay ku oran maayo habaar iyo duco kala dooro?”

Cawrali waxay ku jawaabtay, “hadduu saa i yiraahdo waxaan dooranayaa habaarkiisa markaasna waxaan ka ducaysanayaa Shiikha Maydh ku aasan, sababtoo ah habaar kasta ducada Shiikhaa ka xoog roon, markaas hadduu adoogay cirka soo gujiyo ka yeeli maayo nin aanan jeclaan oo aanan asluubtiisa iyo ragannimadisa ka baaraandegin, baranna inaan oori u noqdo oo uu iigu yeero naa yaa, naa yaa! Ama uu hadba intuu magacayga ka hawoodo yiraahdo taannu wada joogney, tii reerka, tii carrurta ii haysey iwm”.

Murwadii Saluugla weydiisey Cawrala oo tiri, “Cawralaay waa maxay jacaylku, waxse ma iiga sheegi kartaa? Waayo anigu waxaan ahay dumarkii hore oo hadba ninkii doona la siin jirey iyagoo aan erayna la weydiin inay raalli ka yihiin oo meher lagu duugi jirey yaradkana laga qaadan jirey. Waxaad ka soo qaaddaa anigaygan kula hadlaaya aabbahay wuxuu i siiyey aanoo shan iyo toban jir ah, nin badda jirey oo cimrigiisu lixdanka kor u dhaafay

oo aan hal fool ah lagu ogeyn timaha iyaga hadalkoodaba daayoo, tukuba dheerna sita. Tan keliya oo u geysay aabbahay inuu sidaas yeelo waa lacag jacayl anigana lacagtaas uu odaygaasi haystey ayaa sabab ii noqotay inaan noqdo tii loogu heesay “garaad daraney gu’ kaa tegey iyo ma soo noqon galab ku dhaaftaa”. Waxaa dhacday markaa laba sannadood wada joogney iska daa nafac kale ama ninnimo aan ku qabee, wuu cammoobey oo dabkii ka kici waayey, markaasaa geeddigiina la fuuliyey. Markaas in kastoo aan haystey marriin iyo masruuf wacan, ayse ii dhadhami waayeen ayaan damcay inaan iska furo, waxbase waa iiga qabsoomi waayeen naakirad baana lay qoray, sababtoo ah, diinteenna Muslinku siday wadaaddada wax ma garad ka ahi yiraahdaan waxay dhigaysaa in ninku markuu doono iyo siduu u doono u furi karo haweentiisa, laakiinkse, haweentu ninka hadday nacdo dhibaato kastana ha ku qabtee, inaanay iska furi karin, welibana hadday inay diiddo ku adkaysato waxaa la qoraa wax la yiraahdo naakiro. Taasoo ka xaaraamaynaysa inaanay weligeed nin kale guursan.

Haddaba, haddaan ogahay inuu Ilaahay caaddil yahay ragga iyo haweenkuna sagaal bilood ku wada dhasheen ila ma’aha in xaggiisa ragga iyo haweenku u kala sokeeyaan, ee waxaanu waa wax raggu u samaystay inay xaqa dumarka ku duudsiyaan, markay cilmigii iyo aqoontii kaleba ka hor barteen.

Sidaas aawadeed waxaan qabaa inay dumarku diinta iyo cilmoo dhan la bartaan ragga si ay xuquuqdooda uga dhacsadaan, raggana wax ula qaybsadaan. Waayo haddaan wax aqaan maallintii dhoweyto ee qaaddiga Xiis lay geeyey ee naakiradda layga dhigay, waxaan hubaa inaan intaan garta ka helo odaygii xumaa weliba xarig qoorta u gelin lahaa, hase ahaayee waxaa iga hiiliyey laba hal, cilmiguu iga badiyey iyo lacagtiisii markii horena i sababtay. Sida muuqatana goblan baan geeri ku sugi. Haddaba, geelooyin hadalka waan ku dheeraadaye Cawralaay adaan kaa qabsadaye bal jacaylkaad sheegayso wuxuu dhadhamo wax nooga taabo".

Intaanay Cawrali hadalkii bilaabin ayaa wagii sagliyey oo wadaad doonnida saarnaa aadaamay oo yiri, "Allaahu Akbar allaahu Akbar, ashahadduu an laa Ilaaha Illalaahu wa asahaddu anna muxamadan rasuulalaah, haya calal salaax. haya cala falaax" Markii addankii dhamaaday salaadiina la tukadey waagiina ogtiisii dilaacday, baa Cawrali tiri, "sheekadaas jacaylka ah habeen dambe baan u dhiganayna, waayo waagii baa baryey hadda oo waxaa laga yaabaa iney inta raggu ina maqlaan".

***

Inkastoo maayad Hindiyihii jirtay habeenkaas, hase ahaatee baddu aad bay u degganayd dadkoo dhammina waxay ku caweeyeen ilaa waagu galalac yiri haasaawihii iyo murankii dhex maray Calimaax iyo Nuur Ciise, rag badanina ka qayb qaateen, ruux wareerana waxaa u danbeeyey Nuur Ciise, isaguna markii Cali xifaaleeyey ayaa ugu dambeysay.

Maalin labaaddii oo bisha Maarso ahayd 26, waxay ahayd maalin milicdu aad u kulushahay oo kaliil hogad ah, waana maalinta sida la ogyahay gugu ka bilaabmo dalka Soomaaliyeed. Markaa kulkii awgiis sadxaddii doonnida baa rikaabkii loo dallaadeeyey haweenkiina hooso loo xiray ay milicda ka harsadaan. Iyadoo Cawrali isha galisey Calimaax markii ugu horrayseyoo uu doonnida cagta soo saaray, habeenkii xigayna hadalkiisii iyo haasaawihiisii macaanaa dhegta ka maashay, ayey maalin labaadaas aad uga il sugatay. Wuxuuna ugu muuqday inuu yahay nin da’ dhexe ah oo ilbaxnimo indhihiisa ka muuqatay, lagana yaabo inuu afaf badan oo qalaad ku hadlo, haybadna leh. Waxay kaloo aragtay inuu yahay midabkiisu casaan raac yahay oo sanqaroor dheer leh, garkuna madow buuxa yahay oo uu hab wanaagsan u qoray.

Wuxuu kaloo u ekaaday in kastoo aanu kicin nin dheer oo lixaad leh. Waxay kaloo dareentay inuu yahay nin Daraawiishta Ina

Cabdalla Xasan ee Taleex degtey ka mid ah, sababtoo ah waxaa gadaashiisa ku tiirsanaa hal sitaac iyo hal nadi iyo qori maarre ah. Inuu Daraawiishta ka mid yahayna waxay ku sii rumaysay, balaf bay ku maqashay inay doonnida ku jiraan niman lagu tuhmaayay inay Daraawiish yihiin.

Isla maalintaas markay barqadii gaartey ayaa naakhuudihii badmaaxyadii ku yiri, "war maxaad inoo ku jillaabi weydeen miyeydaan ogayn Baddacas inuu ku jiro kalluunka adduunyada ugu macaan uguna qaaya roon oo ah tebediinka, oo hadda doonnida hareeraheeda booddalaysanaaya?" Markaasaa badmaaxyadii amarkii fuliyeenoo la jillaaba, oo isla muddo yar dabadeed soo dhifteen dhawr hal oo tebediin ah. Halkaasaa qadadii lagu bisleeyey tebediinkii oo jaadjaad loo sameeyay. Haddaba, nasiibdarri waxaa dhacday markii qadadii la soo dhigay loona faraxashay ayaa Nuur Ciise afka iyo intuu sanka mara ku duubay diidey qadadii kalluunka lahayd inuu farihiisa galiyo. Markaasaa Cali ku yiri, "Nuurow ninkaan kalluunka ifka ku cunin aakhiraa afka loogu guraa bay Soomalidu tiraahdaa, ee maad cuntid caafimaad iyo nafaquu jirkaaga tarayaaye"

Wuxuu yiri

Dunnunucaay kolkuu qahwaha, debinta saaraayo,
Duuf lulaaye goortuu kalluun, labada daan buuxsho,

Dayn qaate meeshii nin ragi, debec ka maalaayo,
Duryan xume markuu deego buu, dunida hiifaaye
Diintiyo wuxuu caayayaa, daayin Ilaahiise,
Dacwad aan la garanayn iyo, dafashya baas sheegte,
Dood iyo dagaal baa nin raga, lagu daryeelaaye,

Deeqadana haddii loogu ladho derejo weeyaane,

Wax dawddara magaaliyo ninkii degelkeed waa jooga.

Cali baa markaas hadalkii qaatay markii Nuur dhameeyey gabaygii oo yiri, “Nuurow layskuma hayo inuu kalluunku xalaal yahay, waayo waxaa la yiri nebigii baa seeftiisa ku gawracay sebenkiisii.

Waxaan kaloo intaas kuu raacinayaa faa’iidooyinkiisa kale oo aan la ogayn, kuwaasoo ta u horraysaa ay tahay inuu yahay xoolo ama sahay aan loo kala xoog roonayn. Tan labaad waa xoolo aanu col iyo cadaawe kaa qaadi karin. Tan saddexaad waa xoolo aan oomin abaarina gelin. Tan afraad waa xoolo maalqabeenka iyo saboolku u siman yihiin, laakiinse uu bursadaa hadba koodii tabar bataa midkood kasta ha ahaadee. Haddaba haddaan, Nuurow soo gabagabeeyo faa’iidooyinkiisa u weyni waxay tahay, waa hanti uumiya iyo sankuneefle oo dhan loo simayoo la wadaagaa, walibana tixdaydaan maqal, aad garatid wuxuu yahaye.

Kalluunkeennu waa socoobaanka iyo, sodon kun oo jaade,

Seerseer macaanow lebediinku waa, ugu sarreeyaaye,
Oo Sallalaahu nebigii ayaa, sef ku gawracaye,
Saxal iyo abaar kuma kacdiyo, samo kaliileede,
Ma saanyado col duulaa hadduu, sarida kuu deexan
Saxar cuduri saymaha adduun, abid ma saysaansho,
Ninkiise saansaanyahay yaqaan iyo badaha saamkooda,
Oo subaxdii horeetaba kacoo, seebka taranteersha,
Waa sahay daleelaha u taal, saacad dabadeede,
Nin saboola iyo maalqabeen baa, sadho dhex taallaaye,
Waxse loo simay waa kalluun, sebi un baa mooge,
Waxa uu nafaqo siinayaa, jiidh solmoo tegeye,
Badda seylac saaxiyo Berbera, tan iyo Seyhaaba,
Waxaa sare iyo hoos ku jira waa sareedade,
Soomaali baan garan intey silic ku noolayde"

Markii Cali gabaygaas dhameeyey ayaa murwadii saluugli ku tiri Cawrala, "naa Cawralay maxay kula tahay waadigii faalle had iyo jeer ka bixin jiray hadduu Cali eray yiraahdee? Mase ku raacsan tahay wuxuu kalluunka ku ammaanay?" Cawralaa markaas ku jawaabtay, "waan ku raacsanahay inuu kalluunku leeyahay faa'iidooyin badan, laakiinse aanu dadku ogayn sida Calimaax u sheegay, waxaa Saluuglay dhicidoonta sida dunidu ku socoto oo dadka tiradiisu u kordhayso maalinba maalinta ka danbaysa inay

cuntadu iyo xooluhu dadka ku yaraan doonaan, oo markaas laysugu iman doono kalluunka iyo waxa badda ku hoos jira.
Markaas Calimaax rayiga iskaga raacimaayee waa nin wax garada ah oo ka gar jooga ninka kalluunka diiday isla mar ahaantiina aflagaaddo u geystey wixii cuna".

Dharaartaas gelinkeedii danbe baddu waa yara kacsanayd oo hadba doonnida hareeraheeda ayaa mawjaddu tarshadda ku soo dharbaaxaysay, waxaadna moodeysay inay mar walba marka ka dambeeysa karkeedu soo kordhayey cirkuna dheeraad buu u cusbaa oo goortii gabbalkii dhacay ayaa daruuro iyo dabaylo yalax qabow ahi dhanka bariga ka yimaadeen. Markii makhrib la tukadey ayaa murwo Saluugli tiri, Cawralay waxba garan maayo oo caawa haasaawihii ragga maqlimayno, iyadoo laga yaaba inay sabab u tahay dabaysha xoogga leh iyo duufaanta dhacaysa. Wadigiina Cawralay saaka salaaddii ku ballan qaaday inaad jacaylku wuxuu yahaynooga sheekaysid ee bal halkii ka wad".

Cawralaa tiri "waatahay Saluuglaay i dhegaysta adiga iyo geelada kale, waxaanse idiin horreysiinayaa inaan hore jacayl ii qaban, hase ahaatee illaa shalay galab waxaan u maleeyey inuu isaga yahay baa i haleelay, oo waa sida dacarta qaraarka ah, oo misana dhabaqeeda sare macaan yahay. Markaad weydo waa hoog iyo ba' iyo leelleel oo lahbi laabtaada geliya aadan ka ledi karayn.

Markaad heshid waa sida deeq hagar la'aaneed oo waa sida dhuuni aad u baahnayd oo dheef iyo dhaqaale kuu tara.

Xag kalena haddaan ka laba rogo waa sida dooggiyo xareediyo saxansaxada udugeed, haddaan laguu ogayn waa geeri iyo cudur caato kuu dila eh. Haddaad heshid ood hantid waa faraxii naftaadiyo raaxadii adduunyada. Saluuglaay miyaadan maqal maahmaahdaan?

## Afar waa mugdi,

Afar waa maradhaamo, Afar baa ka macaan, Afarna wawga maso.

1. Abaari waa mugdi Cawsna waw maradhaamo Doog baa ka macaan Ninna wawga maso, oo waa ninkaan cood lahayn.
2. Colaadi waa mugdi Ergona waw maradhaamo Nabad baa ka macaan Ninna wawga maso, oo waa ninkii ku dhintay.
3. Habeen waa mugdi Dayaxna waw maradhaamo Maalintaa ka macaan Ninna wawga maso, oo waa ninkii indhoole ah.
4. Hammadi waa mugdi Guurna waw maradhaamo Jacayl baa ka macaan Ninna wawga maso, oo waa caamadaan garanayn.

***

Markay sheekadii halkaas u mareysay oo ay tahay abbaara tobankii habeennimo ayaa moosinkii iyo dabayshii soo kordheen oo hadba sidii dhibic roob badii shaxshax ku soo tiri doonnida gudaheedii, baxaaridiina maaweredda gurtay.

Eraygaas maawered waxay baxaaridu ku samrisiisaa dadka rakaabka ah, waxayna yiraahdaan marka baddu darbadaysan tahay oo heeraabka hore ee doonnida iyo mawjaddu kulmaan, biyuhuna sare u kacaan oo dib ugu soo dhacaan doonnida dusheeda iyagoo sidii dhibico roob ah.

Naakhuudihii iyo sareenjigii waxay amar buuxa ku bixiyeen in badmaaxyadii iyo wixii doonnida ku jiray oo dhammi heegan ahaadaan, khaas ahaanna raggii hawlaha gaarka ah lahaa, oo ay ka mid ahaayeen ninkii wadeenka ahaa ama shukaanta hayey, iyo raggii biya dhuridda lahaa. Waxaa muuqatay inuu naakhuuduhu ahaa nin dhibaatooyin iyo danqaara badan soo galay dhawr jeerna doonyo la degeen ama la sigteen. Sidaas darted wax aragagaxa oo ay gelisay baddii kacday ma jirin, inkastoo uu maleeyey ama ilaadiyey siday daruurtu cirka ku ahayd inaanay sagleela la'aan dhacayn.

Iyadoo rag iyo haween wixii doonnida ku jiray werwer iyo walaac ka galay siday baddu ahayd cirkuna jaha walba uga soo awdmay, ayaa Cawrali hablihii ku tiri, “hablow maxaa mid waliba ku

dardaarmaysaa, waa intaasoo doonnidu degtaa oo mid ina ka mid ahi noolaataa labana dhimataa ama midina dhimataa labana noolaataaye"

[1] Waxaa yiri maahmaahdaas ninka gabayaga ahaa oo la oran jirey Ciisa Maxamuud Cali.[2] Hambabaro (hambarayooyin) Waxaa jirtay inay dhowr jeer ilbidhiq ku arkeen markay mawjaduhu is gedgediyaayeen meel cabbaar u jirta ee ka yar horraysa waxay u maleeyeen madaxyo dad, oo qoryo ku jooga lagana yaabo inay ahaayeen dadkii doonnida kula jirey qaar ka mid ah.

Cawralaa markaas weydiisey Calimaax, waxayna ku tiri, "Caliyow ma laga yaabaa dadkaas inna ka horreya oo looxaanta waxa u eg ku jooga inuu ku jiro ninkii reer miyiga ahaa ee Nuur Ciise?" Cali baa markaas wuxuu ugu jaawaabay "Cawralaay kaasi inna ka horreyn maayo, waayo dabbaasha ma aqoon siduu igu yiri." Calimaax wuxuu Cawrala dusha ku sidaba waxaa niyadsami gashay oo orodkii dabbaasha kordhiyey markay u muuqatay buurta Suradeed feeqeeda dheer.

Hadday soo dhowaadeen oo xeebtii u yimaaddeen in hal kiilomitir ah, ayaa Cawrali Calimaax ku tiri "Calimaaxoow sida ii muuqata baddan badbaadaynu kaga baxaynaa, in yar baana innoo ka hartay

xeebtii, markaas lagama yaabo inaynu dib isugu cidlaysanno oo hadal ku kala bogannee, waxaan kuu sii sheegayaa inaad marti iigu tahay magaalada Xiis ila intaad doontid." Calimaax baa markaas ku jawaabay, "waa tahay Cawralaay haddaanay rag aan filayo oo Xaruntii Taleex ka yimid igu sugayn magaalada Xiis, waa kaa guddoontay martiqaadkaas.

Cawralaa markaas tiri, "waxaad Calimaaxow iiga warrantaa Darawiishta iyo waxay muhiwadoodu tahay, waayo sidaan doonnida dusheedii ka maqlaayey haddana ii muuqata ka mid baa tahaye."

Calimaax wuxuu ku yiri, "Daraawiishtu waa dawlad u dhalatay dalka iyo dadka Soomaaliyeed, muhiwadeeduna waa ilaalinta gobaninimada Soomaaliyeed iyo ilaalinta diinta Islaamka oo Ingiriiska iyo Talyaaniga iyo Xabashiduba duullaan ku yihiin doonayaanna inay burburiyaan oo markaa inna gumeystaan, gaala madowna inna ka dhigaan. Waxyaalaha kale markaynu magaalada tagno ayaan kuu dhammays tirayaa." Cawrala waxay markaas tiri, "Haddii muhiwada Darawiishtu sidaas tahay maad Calimaaxow i kaxaysid aan dagaalkaas gobannimadoonka ah ka qayb galee, kaana barbar dagaallamee, mase raggu had iyo jeer wuxuu jecelyahay inaanay dumarku libinta gobannimada la qaybsan lana sinnaan ee ma oggolid?"

Cali hadalkaas Cawrala uga ma jawaabin, sababtoo ah waxaa xeebtii oo in yar u jirtey saacaddu markay ahayd 5.20 casar liiqii uga muuqday badwigii Nuur Ciise oo amakaag geliyey siduu baddii uga soo baxay ugana soo dheereeyey. Waxaa kaloo xeebtii uga muuqday niman fardo wata oo uu u maleeyey Daraawiishtii sugaysey imaatinkiisa, oo warkii degidda doonnida loo sheegay soona birmaday si ay dadkii doonnida ka soo caariyey wax uga soo guraan.

Markay saacaddu ahayd 5.25 galabnimo waxaa ugu soo horreeyey Calimaax iyo Cawrala inay gacanta soo qabtaan Nuur Ciise iyo murwadii Saluugla' oo xeebta ku sugaayey.

Halkaasay dhar ay la sugaysey Saluugli' u gelisay amminkiiba Cawrala. Waxaa nasiib wanaag ahayd inay wixii dad doonnidii ka soo badbaado baxay, ka soo baxeen intoodii badnayd meel magaalada Xiis u jirta 5 km. halkaasoo degdeg loogu gurmadey oo la geeyey magaaladii Xiis, Cawrala iyo Calimaaxna waxaa la sii fanaysiiyey fardahay wateen nimankii Daraawiishta ahaa, waxaana ka soo baxay doonnidii Cawrala iyo Calimaax, shiikh Araye Ceelabe, Nuur Ciise, marwo Saluugla' iyo shan iyo toban baxaaridii ka mid ah, waxaana la waayey lix ruuxoo ay ka mid tahay gabartii saddexaad ee la oran jirey Haweeya.

Bacdama habeenkaas la wada raxaabaysnaa lana gataati dhacay, ruux walbina derintii loo dhigay siduu ugu jiifsaday isma loodin, khaas ahaanna Cawrala iyo Saluugli ilaa ay afar iyo labaatan saacadood hurdeen madaxa kor umay qaadin. Raggiise markay abbaara barqadii ahayd, ayaa loo yimid oo afurkii aroornimo la siiyey isagoo laga soo sameeyey gurigii Cawrala Barre ee aabbaheed iyo hooyadeedba joogeen.

Afurkii haddii afka la saaray oo nin iyo laba jeer la degey, ayaa Nuur Ciise yiri, "Calimaaxow ma fileysey inaan baddaad ogeyd siday ahayd, intaan nabad kaga soo baxo berriga kugu sii sugo anoo weliba dadkii doonnida qaar ka mid ah gacan siiyey? Maxaadse iigu digatey ugana jeedday i sii sug markaan ku iri ar hayga tegin xal waa xun yahay? Midda kale weligaa ma maqashay naftaan Eebbahay dilin ma go'do?"

Markaasaa Cali yiri, "horta niman yohow waan ku gafey hadalkaas waxaana la yiraahdaa Ilaahay eray gef ah waa kaa yeeriyaa kugumase dhaafo, mana jiri la'a inuu Ilaahay karaan ku yahay naf dhimatay oo jiidhkeedii iyo jurmigeedii aboor cunay inuu soo nooleeyo, iskaba daa midu bad ka badbaadiyo'e.

Haddaba, waxaad ii sheegtaan sidaad uga soo baxdeem?" Naakhuudihii baa yiri, "Caliyow iska jir ninka la yiraahdo Nuur, waayo waa la weheliyaa'e, sababtoo ah, tiraba shan qof isagaa gacmaha intuu na qabtay na soo saaray looxaan u maleeyey

sadxaddii uu ku fadhiyey oo aan doonnidii la degine ka soo go'day ugu horraystiiba."

Nuur baa hadalkii qaatoo yiri, "horta anigu waa soomaa oo salaadaa, sadaqadana ma dhaafo, eexdana ma aqaanno, weligayna booli ma cunin, xaaraanna hadalkeedaba daayoo sadqa gawrac baan ahay, tuugana waxay ii tahay maalintaan isku deyey inaan hooyaday ka xado timir gobor barraho saaran, taasna kuma liibaanin oo waxaan dabada soo qabsaday abeeso aabuq ah oo goborta ku jirtey. Ilaahay waan ka mutaystay inuu ii miciino oo wanaag madhax iiga dhigo maalintay iigu xumayd, wixii rag hoogey dumarna leeleelay inuu sadxaddii aan ku fadhiyey ii fikiyo oo aanan baddii cagaha marna gelin."

Halkaas markay mareysey ayaa Shiikh Araye yiri, "Nuurow mar hadday runtaa tahay intaad sheegtay wallaad ku bannaan tahay nin karaama leh. Kolkuu dhammeeyey shiikhii hadalkii ayaa Calimaax kacay oo isla taagay nimankii Daraawiishta ahaa ee magaalada ku sugaayey si ay isu waraystaan. Waxayna ku biiriyeen inay degdeg u baxaan, sababtoo ahayd Xaruntii Taleex ayaa laga qaamqaaminaayey duullaan lagu saaraayey gumeystihii Ingiriiska si looga kiciyo xeebahaas bari iyo magaalada Cadmeed ee saldhiga u ahayd. Haddaba, Calimaax wuxuu ahaa dooyo ama horseed loo diray inuu ogaado soona ilaaleeyo Ingiriisku meeluhuu ka fadhiyey magaalada Cadmeed iyo agagaarkeeda isla

markaasna war buuxa ka keeno xeebaha Maakhirkoost waxa doonya jooga si markaas Daraawiishi markay qabsato xeebahaas ay doonyaha intay qabsadaan ugu gudbaan magaalada Cadmeed oo halkaas loogu cidhib tiro Ingiriiska ciidamadiisii saldhigyadaas ka soo gudbi jirey. Inuu Sayidku dareen ka qabay Ingiriiska Cadan degganaa oo uu doonaayey inuu duullaan ku saaro waxaa u marag ah gabaygiisan hoos ku qoran, oo uu ku yiri:

*Maandhow raggii Laxaj jiroo, lodhadhaa yimide, Maadhow lix seben buu fadhiyey, Laaso iyo Cayne, Maandhow loxoskii horay ii ekayd, liinka gubiddiise.*

Tixda u horraysa saddexdan tixood waxaa ku magacaaban magaalada la yiraahdo LAXAJ. Haddaba magaaladaasi waa magaalo, magaalooyinka Cadmeed ka mid ah oo u jirta magaalamadaxda Cadmeed 30 mayl oo xagga waqooyi ka xigta. Sida taariikhdu sheegaysana ciidamadii Ingiriiska ee Darawiishtu la dagaallameysey magaaladaas Laxaj iyo magaalada la yiraahdo Beer Axmed ayaa saldhigyo u ahaa. Sidaas aawadeed baa Calimaax horseed ilaalo loogu diray inuu war tifaftiran uga keeno Taliskii Xarunta Darawiishta si duullaan magaciisa qarsooni ahaa “Baddacas” xeeladdiisa iyo tabatabayntiisa loo dejiyo.

Nimankaas Daraawiishta oo afar ahaa waxay iyana sii ilaaleeyeen tiradoodana qaateen doonyihii marsooyinka Xiis, Maydh, Laasqoray, Ceelayo, Qaw iyo Boosaaso dhignaa.

Arrimahaas daraadood ayey ka fursanwaa noqon weydey in Calimaax in jaallayaashiis degdeg u baxaan oo aadaan Taleex Xaruntii Daraawiishta. Intaanay bixinse ayaa Calimaax ka codsaday in loo joogo ilaa fiidka inta uu arrimo hoos ahaan ah soo dhammaysanaayo, taasna way ka ogolaadeen nimankii kale.

Haddii la casheeyey oo ay ahayd abaara siddeedii saac ayaa Calimaax aadey gurigii Cawrala Barre intuu sii waraystay halkuu ku yaal. Aqalka Cawrala Barre wuxuu magaalada kaga yiillay xagga bari oo xeebta raacsan, wuxuuna ahaa cariish saddex qol ah berended weynna leh. Cali markuu albaabkii garaacay waxaa ka furtay Cawrala hooyadeed oo wuxuu ku yiri, "iska warrama, Cawralana iigga warran." Cawrala hooyadeed waxay ku jawaabtay, "waa nabdoonnahay, Cawralina hadday soo baraarugtay." Cali baa yiri markaas, "waxaan is iri Cawrala siday tahayna sii eeg siina nabad gelyee, waayo caawaan baxayaa." Cawrala hooyadeed baa markaas tiri, "ma ninkii la sheegaayey oo badda ka soo saaray baad tahay, eeddo Ilaahay ha kaa abaalmariyo ee hore u soco waatan sariirta saarane." Cali baa markaas u galay Cawrala oo intuu barbar fariistay gacanta u dhiibey oo salaamay

kuna yiri, “Cawrala iska warran, waxaan kuugu imi inaan ku sii nabadgelyeeyo, waayo caawaan aniga iyo niman kale baxaynaa waxaanuna ku simaynaa ilaa Taleex ee nabadgelyo ilaa intaynu dib u kulmayno haddii Alla yiri.” Cawralaa markaas tiri, “horta Ilaahay ha ku nabad geeyo ilaa meeshaad u jeeddid, aniguse waxaan jeclaa inaad ila joogtaa oo aan aad isu barannaa, martiqaadna kuu sameeyaa kuna abaalmariyaa. Haddiise ayan suuragelayn inaad negaatid, maxaa inoo ballan ah oo aan ku kala tegaynaa.” Cali waa aamusay oo wuxuu ballan ku qaado buu soo saari waayey. Iyadii baa haddaba tiri, “waxaa Caliyow inoo ballan ah markaad ka guuleystaan gaalada iyo dulliga aad la dagaalamaysaan laba hal. Tan u horaysa, waxaa inoo ballan ah inaynaan is illaawin oo uurka isku haynno. Tan labaad waxaa inoo ballan ah inaan aqal aroos sii aloosiyo oo maalintaa aynu guri galno.”

Cali wuxuu ku yiri, “waa tahay Cawralaay saasaa inoo ballan ah ee nabadgelyo raggii baa i sugayee.” Cali halkaasuu ka baxay gurigii oo u tegey jaallayaashii. Saacad dabadeedna waxay ka guureeyeen magaaladii iyagoo lug ah, waxayna fardihii oo loo mirsiinaayo ugu tegeen buurta salkeedii oo saddex kiiloomitir u jirta.

Habeenkaas waxay guura ahaadaanba fardahana kadlaysiiyaan, waxaa waagu ugu beryey buuraha Karmaan, halkaasoo ay xakamihii kaga debciyeen fardihii, maalintaana ugu hargaleen reera yaalla oo si wacan u sooryeeyey oo tulud geela u loogay. Duhurkii markay tukadeen ayey barihii fardaha ku tageen, waxay koosa raqlaysiiyaanba waxa la kulmeen raxan biciid iyo wariilayaal haldhaa daadahaynaayo oo uu dedibta ka darminaayo. Fardihii ayey cabbaar ku baacbaacsadeen biciidkii ilaa ay saryankii u weynaa ku xiijiyeen oo qabsadeen habeenkaasna isagii bay sahay ka dhigteen inta holac lagu bisleeyey ilaa ay ku laqanyoodeen shishlaantiisii.

Habeen saddexaadkii ayey galeen Xaruntii iyadoo markaas ay tahay habeen barkii oo ilaaladii ma'ahee cid kale aanay soo jeedin, markaasuu raggii mid waliba fadhiguu ka tirsanaa u hurda tegey galahoodii. Subaxdiiba Calimaax wuu jarmaaday isagoo ku tala gelaaya in laga sugaayo war guud iyo war hoose oo ku saabsan dhulkuu sahanka u tegey iyo wixii fariimo ahaa oo ay soo direen dadkii raacsanaa Daraawiishta. Lixdii aroornimaba wuxuu isa sii taagey irridkii Sayidka hase ahaatee waxaa Sayidkii soo fariistay siddeeddii saacadood, halkaasoo uu amar ku bixiyey inaan Calimaax ma'ahee cid kale u soo geli karin. Cali baa hadalkiisii ku bilaabay "Sayidii waad salaaman tahay salaaxiinta aabbeheedow." "Waad salaaman tahay ee Cali soo fariisoo ii warran", baa Sayidkii

yiri. Cali baa markaas yiri, “Sayidii kuu warramay horta doonni baa ila degtey kase nabadgalay, waxaana ii raacda inaan kuu sheego inaan Cadan tegey, meel la yiraahdo Laxajna waan u dhaafay, Maakhirkoostna waan soo waraystay sidii ballanku ahaa.

Haddaba, Cadan iyo Laxaj waxaan ku soo arkay gaasas badan oo askar Ingiriis ah, iyo guutooyin kale oo isugu jira askar madow iyo askarta timaha qadaadka ku leh ama aynu u naqaanno Qadaadweyn oo Hindiya ka yimid. Ciidamadaasoo dhan waxaad moodaysey in loo soo qabanqaabinaayey inay ciyoon duullaan dalkeena iyo Daraawiish ugu soo baxayaan.

Waxaan kaloo soo arkay oo aan la yaabay garanna waayey, wax cirka duulduulaayey oo gorgorkoo kale ahaa. Haddii aan aad u xansadayna waxaa laygu sheegay magacooda dayuurado.” Sayidkii baa markaas dooyadii iska furay intuu dareen galay oo yiri, “Cali maxaad u malaynaysaa in lagu isticmaali karo dayuuradaha aad sheegtay? Mase laga yaabaa inuu Ingiriis ina kula dagaalamaayo markaynu dhulkii kaga adkaannay kuna curyaaminay? Sideese baad u malaynaysaa bay ugu dagaalami karayaan dayuuraduha aad sheegay? Waxaan uga jeedaa maxay dayuuraduhu soo ridi karaan?” Calimaax baa markaas jawaabay oo yiri sidaan warka ku helay, “waxaa la yiri bamam iyo rasaas bay ku soo ridaan dadkay laynayaan.” Wuxuu kaloo Calimaax

warkiisii ku daray in diyaaradahaas laba nin kaxayso isagoo midna yahay duuliyaha kan kalena yahay kan waxay ku dagaalamayso tuura.

Mar Alla markuu Calimaax warkiisii dhameeyey waxaa lagu hambalyeeyey oo lagu gacan saaray hawlihii loo diray oo uu sida fiican u soo qabtay, waxaana loogu abaalguday oo la siiyey gabar uu dhalay nin Khusuusiidii ka mid ahaa oo isla markiiba loo dhisay. Waxaa kaloo la siiyey hal senge oo midabkiisu baroor ahaa iyo Kadin geela oo laga soo xaf gooyey fadhiyadii geelasha fadhi ka mid ahaa. Waxaana dhacday in isla markiiba madaxtooyadii Daraawiishtu fadhi yeelatay, si ay xeeladihii iyo tabatabayntii duullimaadkay damacsanaayeen u dejiyaan, ugana gaashaantaan ciidamadii gumaystaha oo lagu soo sheegay Cadan iyo agagaarkeeda.

# CAWRALA IYO DUXASHADII JACAYLKA

Iyadoo Cawrali isha gelisey Calimaax doornimadiisii ugu horraystii uu doonnida cagta soo saaray markay marsada Cadmeed ka soo fuulayeen, haasaawihiisiina dhegta ka maashay habeenkii iyo maalintii u horreysey, isla markaasna ay u raacdey mahaddiyo abaalkay u haysey badbaadadii uu ka soo badbaadiyey baddii markay doonnidii la degtay isagoo qiyaastii dusha ku sidey toddoba iyo toban saacaddood, ayaa jacayl ku abuurmay Cawrala oo mar alla markuu ka dhaqaaqay oo uu nabadgeliyey la arkay iyadoo isla habeenkiiba hawsaysa oo ku selelaysa Calimaaxoow, Calimaaxoow intay sariirtii ka soo dhacday!

Waxaa dhacday in markii waagii beryey la waydiiyey waxay ugu hadaaqaysay Calimaax. Waxay tiri “waxba kama ogayn, waayo ruuxna ma ogaan karo wuxuu isagoo hurda oo sardho ku jira ku hadaaqaayo, waxaase laga yaabaa inuu afku iga xaday riyadaan ku riyoonaayey Cali oo isagoona igu riyoonayaa oo aanu markaa riyadii ku haasaaweyno.

Markay ahayd barqa gaaban ayaa waxaa u soo wareegtay Saluugla, iyadoo ay u saarageli weydey inay hore ugu timaaddo, sababtoo ahayd daalkay soo daashey, ayey gataati dhacday oo soo toosi weydey.

Haddii in yar la wada fadhiyey aqalka ardaagiisa oo ay Cawrali ku milicsanaysey ayaa Saluugli hadashay oo tiri “Cawralaay waxaan ka xumahay gabartii doonnida in kula jirtey oon soo nabadgelyo bixin.” Cawralaa jawaabtoo tiri “amba aad baan uga xumahay, waxaanse hubaa hadday saddexdaydii talo yeesho oo intay dharkay sidatey iska yaryarayso oo sidaan soo jeediyey raggii doonnida ina kula jirey mid iska lusho ama qori cuskato waxaa laga yaabi lahaa inay badbaadi lahayd, sinase ma yeelinoo waxaan xusuusanahay markay doonnidu sii degaysey, iyadoo sanduuqeedii dhabta ku haysata, markaas waxaaba laga yaabaa lexejeclo aawadeed inay sanduuqii u quuri weydey inay iska sii deyso oo lafaheed u dadaasho.”

Saluuglaa markaas tiri “mar hadday saas yeeshay suuncaaqiibo malahayn oo waxba kuma wanaagsanayn, dardaarankeedina waxaan u sheegay hooyadeed inay deynkii ka bixiso. Midda kale waxaan kuu sheegayaa ruuxii haddiisu gasho talada waa ka hanfafaa oo ma haleelo tan habboon sida ninkii gabyey yiri:

*Hadday sababi geli maanka waa, la iska suurshaaye, Sarbeeb malag ah ayaa laga dhigaa, saacaddad dhimane Oo*

# *solimaysid taladii Ilaah, seeg ku leeyahaye*

Midda kale Cawralaay waxa jirta inaan taladii Ilaah gooyo aan laga gudbi karin, oo anba haddaan Ilaahay gacanta ii gelin sadxaddii doonnida oo aanu i soo saarin odaygii reer miyiga ahaa, cidina aanay ka filayn inuu ka soo baxo ugu horreystii doonnidii layma arkeen." Goortay hadhimadii in yar ka hartay ayey kala tageen iyagoo ballamay inay isu soo noqdaan fiidkii si ay u wada caweeyaan. Mase suuragelin inay habeenkaas isu yimaaddaan iyadoo Saluugla qaraaba badani soo booqdeen oo ay markaas ka soo bixi weydey.

Habeenkaasoo ahaa habeenkii u saddex ahayd intay badda ka soo maqnaayeen, Cawrali ma ledin, waxaana hadba la hor keenayey doonnidii iyo darbaddii heshay oo roobka, onkodka iyo hillaac lahaa iyo doonnidii degtay oo ay ka soo dabbaasheen iyadiyo Calimaax. Waxaana habeenkii oo dhan riya ahaan la hor keenaayey aragtidii markay soo dabbaalanayeen iyadiyo Calimaax oo uu dhabarka ku sidey. Sidaas aawadeed bay habeenkaas oo dhan u laba legdoonaysey oo hadba u dhinacyeynaysey ilaa waagii ku galalac yiri, iyadoo aan laba indhood isu keenin.

Habeenkii dambe gooray fiidkii tahay ayaa waxaa u timid Saluugla sidii ballanku ahaa. Haddaba markii lays bariidiyey ayey Cawrali soo jeedisey inay israacaan oo xeebta ku soo dabayshadaan, Saluuglina waa yeeshay oo markaas xeebtii baa laysu raacay, oo xagga xeebta bogox magaaladii looga baxay. Cabbaar markii la wada socdey oo dhawr jeerna badda cagaha la geliyey, ayey Cawrali burciid tuuran oo tamuux nadiif raaxale ah fariisatay, oo in yar dabadeed intay bari u jeensatay beerdhigaalaysay oo ku tiri Saluugla "Saluuglay abbaaye waxaan helay meel macaane kaalay barbarkayga fariiso." Saluuglaa intay barbar fariisatay Cawrala bey dhiidhiibsatay oo ku tiri

"Cawralaay maxaad baddan inoo ag fariisisay waayo waxaan soo xusuusanayaa dhibaatadii inaka soo gaartay." Cawralaa jawaabtoo tiri "adiguna Saluuglaay waxaa laga yaabaa inaad badda araggeeda ka baqaysid anna waxaan u imi inaan dhibaatadaan ka soo maray dib u soo xusuusto, sababtoo ah waxay sidii biladayaha ii muujinaysaa ninkii Calimaax ahaa oo mawjadahaad hirkooda arkaysid intay le'eg yihiin ila soo dul maaxay oo i nabad keenay."

Saluuglaa markaas tiri "naa bal kaalaye! Heedhe ma jacaylkaad ka sheekaynaysey habeenkaynu badda marayney ayaa ku haya, waxaanu waa yaabe." Waxay kolkaas ku jawaabtay Cawrali, naa waxba garan maayee, balse i maqal.

Baxanay habeennada indha baal ma saarinoo,
Duni baadi weeyoo bilisina illowshaha,
Waa u beer nugeyloo ba'a iyo baraaraha,
Baraarahay xuseeyaan anse baal ka marayoo,
Biimahaad ogayd iyo cirkoo biriq hillaaciyo,
Bartii roobka duufaan biyihii shubmaayiyo,
Dakhalkii bacramay baan baayey ku selelaa,

Bisin Alla bir weeyaan sow bilow ma taabinoo,
Eebbe ima ballaysiin anoo baaxa degayoo
Bes ah oo hafanayoo bixi layd naftaydii,
Baaqaan hayey iri sow Cali-baxmaaxoo,
Berrigii imuu gayn baari iima qabanoo,
Ogoow wey badbaaddaa naftaan Qaaddir bixinayn,

Waa baab jacayloo baarax uma ledaayoo
Baddaasaad arkaysoo buuraha la moodoo,
Badraankii libaax iyo hambabarada booddiyo,
Bahaluhu ka buuxaan way bilaha dayaxoo
Buruudkii Badmaaxiyo nuur layga biliyaa,

Waa boog jacayloo bukaankii la yaab ma leh,
Beerkiyo wadnaha iyo bogguu hoy ku leeyahay,

Waa baab jacayloo billaawihii afaystoo,
Bedekayga degayoo igu beeray boholyow,

Waa baab jacayloo waxa ii bogsiina ah,

Ama ii bushaara ah oo ii baraara ah,
Ama ii barwaaqa ah baanashada haweenoo,
Badmaaxaan hantayoo beri aanu kulanoo,
Beryasamo ku waarraa."

Markay Cawrali dhammaysay heestaad ayaa Saluugli intay labada dhafoor gacmaha saartay aamustay oo waxay ku hadasho garan weydey. Haddaba, cabbaar hadday aamusnayd ayey ku tiri Cawrala, “alleylehe waxaa sheegaysey baa Cawralaay ku hayee maxaa talo ah oo aan kula qabtaa?”

Cawralaa markaas jawaabtay oo tiri “waxaan u malaynayaa inaadan waxaan i haleelay waxba igala qaban karayn, laakiinse waxaan kaa codsanayaa haddaad geeladay tahay inaanu xaalkaasi ina dhaafin oo cidday gaarin. Sababtoo ah, sidaad ogtahay dadka Soomaaliyeed ceeb iyo wax xun bay u yaqaaniin jacaylka, dabadeedna hadday i maqlaan waalidkay way i dayrinayaan. Midda kale sidaad ogtahay waan doonanahay markaas doonimaayo inuu arrinku iga dhicisoobo ilaa aan Calimaax arko oo wax meel isla dhigno, iyadoo sida muuqata ay dhib leedahay sidaannu isu heli doonno. Waxaanna isku hayaa inaan ka daba tago ilaa Xaruntii Taleex iyo inaan waraaq u diro. Saluuglaa hadalkii qaadatoo tiri “horta sidaad sheegtay weeye Cawralaay dadkeennu jacaylka wax xun bay u yaqaanniin, waliba xagga dumarka iyada waaba dhimasho haddii lagu maqlo, markaas ha iga biqin inaan kaa xog warramo. Midda kale haddaad ka dhabaysid inaad Taleex iyo halkuu joogay aaddid waan kuu wheel yeelayaaye ogow, anoo tala ahaan kuu soo jeedinaaya inaad horta

waraaq u dirtid, oo hadduu markaas soo jawaabona waa saan rabnay hadduu soo jawaabi waayana aadno.

Hadday habeenkii gelinkiisii dambe noqotay, oo dayaxii baalka dhigay oo ay soo mugdiyawdey ayey labadoodii ka soo kaceen xeebtii oo soo aadeen magaaladii. Markay Cawrala gurigoodii gelaysay ayey ku tiri Saluugla “waxaan xaalkaa ka yeelayno waan ka wada tashanaynaaye tu san.” Saluuglaa tiri “waa tahaye nooli kulantee, adaanna kaa war sugayaa.”

Haddaba iyagaan muddo dhawr maalmood ah kala war qaadan ayey Saluugli maalintii dambe u timid Cawrala, waxayna u sheegtay goor barqo ah inay niman xaggaa iyo Xaruntii aadayaa joogaan magaalada. Halkaasaa Cawrali degdeg intay qalinkii iyo waraaqdii isu qaadday iyadoo ku qoraysa af Carbeed hadalka intiisa kale, laakiinse ay gabayadu yihiin af Soomaali ay xuruuf af Carbeed ah ku qortay.

Waxay tiri oo ka bilawday warqaddeedii:
Gacaliye Calimaax,

Calimaax sidii johoradeed, yaanan kuu jamane,
Jannadii sidaad tahay, yaanan jawda kugu hayne, Dabadeed
aan kala jiidanne’e, mar ila soo joogso.

Calimaax, waxaad iga guddoontaa salaam kalgacal oo kasha iyo laabta ka soo go'day. Waxaad kaloo iga guddoontaa mahad weyn iyo salaam uurka ka soo baxday. Intaas waxaa ii raaca inaan warqaddan qoriddeeda bilaabay saddex jeer oo haddana saddexdiiba jeexjeexay, ilaa ay ugu dambaystii iga soo go'day inaan illawba ilaa kuu soo diro taboo ah tii afraad oo jeexjeexiddii ka nabad gashay.

Ka maaggiddaas aan ka maagmaagay warqaddanna waxaa iigu wacan welwel iyo walaac iyo waxaan garanwaayey oo ila soo dersey ilaa maalintii aragtideennu kow isu ahayd, ee ishaydu kugu dhacaday laabtayduna ku raacday, oo ay isla mar ahaantii nafsaddaydu ku doontay.

Haddaba, ugu horraystii waxaan jeclahay inaan kaa is xusuusiyo waa intaasoo aad i illawsantahaye inaan ahay gabartaad huuriga ka soo wada raacdeen dekedda Cadmeed oo markii doonnida la soo koraayey aad gacanteed midig ku taageertay taada midig, dabadeedna doonnida soo wada raacdeen.

Magaalada Cadmeed maalintaan, casar ka soo dhoofnay,
Waxaan ahay middaad caawintood, cudud taageertay,
Waxaan ahay mid kuu cabatayoo, caashaq dhibayaaye,

Waxaan ahay mid habeenkii koowaad oo ay doonnidu guuraha ahayd dhegaysanaysay haasaawahaagii iyo gabayadaadii macaanaa murt dana lahaa, ee adiga iyo odaygii Nuur Ciise la lahaa idin dhex maray, khaas ahaanna dheg u lahayd xifaalayntaadii ku saabsanayd habkiyo hannaankay reer miyigu kula dhaqmaan hablahay guursadaan iyo murwooyinkey qabaan.

War cilmigiyo haasaawihii, lagu caweynaayey,

Waxaan ahayd codkaad tiri miduu, cudur geyeysiiyey,

Waxaan ahay mid kuu cabatayoo caashaq dhibayaaye, Habeenkii labaad ee baddu kacday oo roobkii mahiigaanka ahaa ee onkodka, hillaaca, iyo hanqarka badnaa da'ay doonnidiina degtey, waxaan ahay tii kuu baaqday oo aad gacan qabatay iyadoo baaxaadegaysa dhawr jeerna hafatay.

Baddoo cartay mayeygaad ogayd, calool xumaantiisa,

Waxaan ahay cadraddaad siddoo, calaf u laabnaaye,

Waxaan ahay mid kuu cabatayoo caashaq dhibayaaye,

Waxaan ahay mid abaal iyo mahad weyn oo aan la koobi karayn uurka iyo laabta kuugu haysa, biimahaad ka badbaadisay adoo dusha ku sidey muddo aan toddoba iyo toban saacadood ka yaran, aadanna ka daalin sidneedkeedii ilaa aad berriga nabadgeliyo keentay inkastoo hambabarooyinkii iyo libaaxii badeed ina seegeen dhowr jeer.

Waxaan ahay cirkoo hooray, iyo caadka oo kale'e,
Waxaan ahay casaan raaca iyo, midab casaawiira'e,
Waxaan ahay canabkii ka baxay, Calihii doognaaye,
Waxaan ahay carfoon iyo udgoon, iyo cadarkii Baariye, Waxaan ahay mid kuu cabatayoo, caashaq dhibayaaye.

Waxaan ahayd haddii runtii lagu arooro, Cawrala Barre oo ah middaan sheegay oo isheedu iyo laabteedu ku raaceen aragtideedii u horraysay, oo aad shaki la'aan nafteeda iyo ruuxeeda leedahay, aadanse adigu ogeyn, iyaduse had iyo jeer, habeen iyo dharaar, hurdiyo soojeed kugu hammiyeysa oo jacaylkaaga iyo kalgacalkaaga oo jiidhka iyo lafaha galay aawadood, oon iyo anfaco diiddey.

Waxaan ahay midaan cunin cuntada, calafka sooreede,
Waxaan ahay mid cadanyootayoo, cidihii dayrsheene,
Waxaan ahayd mid caynkaaga iyo, caaqil mehershaaye,

Ugu dambaystii waxaan ku soo gabagabaynayaa warqaddaydan oo intaas ii weheliya Calimaaxoow, dayax buuxa nuurkiisa lahaayow, man galool uduggiisa lahaayow, waqayga Caleed iyo waadhida Hawdow, waagoo beryaaya wajigiisa lahaayow, mayey hooray hanqarkiisa iyo hillaaciisa sansaanshow, balanbalkoo

dildillaaciyo midabka balanbaalista lahaayow, markii aan saxariiray saacii i qabtow, Soomaaliyi quruxdeeda sinji bay ula lahayde sunnaari la moodyow, sed bursiimo lahaayow, in aadan marnaba arrinkan aan kuu soo qoran yaraysan, ee aad si degdeg ah war iigu soo celisaa ama aad i soo gaartaa aan aniguna raaxada adduun maqsuudee adiguna aad muudsatee macaankii iyo roonaantii ay murwo u roonaan jirtey mudanaheeda.

Casarkii haddaan weel la culay, caano kugu siiyo, Cishihii haddaan sarar cusbaale, kugu cashaysiiyo, Oo waa caafimaad rage haddaan, cagaha kuu duugo, Asaadan caloosha igu hayn, Caliyow yeelkaada.

Waxaa iga dardaaran ah, haddaanan war buuxa ciyeen kaa helin inaad adigu wixii kalgacalkaagu i gaarsiiyo masuul ka tahaye bal ogow.

Ogoobey haddan dayuxu jirin, dirir ma nuureene,
Ogoobey haddaad diiddo, waan degel baxaayaaye,
Oo hal iga dardaarana Calow, debinta maan saaro, War diifta aan qabo hadday, digasho ii raacdo, Waynoo daartii aakhiro, iyadaan cidina deyneyde. Waa Gacaladaa Cawrala Barre, ee deggan magaalada Xiis Xarrago.
Ogoobey haddaan daaqu bixin, duunyo ma foofteene,

***

Halkaasay warqaddii u dhiibtay nin la yiraahdo Shirwac oo raggii Xarunta qabanaayey ka mid ah, iyadoo kula ballamaysa inaanu cid kale u dhiibine farta ka saaro Calimaax, waxayna raggii sii dhexeen afar habeen ilaa Taleex.

Haddaba, maalintay tageen Taleex maalintii ku xigey markay abbaara tobankii aroornimo ahayd oo ay Jimce tahay ayaa ninkii warqadda sidey raadiyey Calimaax. Wuxuu doondoonaba wuxuu ka helay isagoo madan lagu shiraayo dhex fadhiya oo shirka wax kaga jira. Shirwac wax kale ma yeeline shirkii buu dhex maaxay ilaa uu Calimaax warqaddii fart aka saaray sidii ballankii ay Cawrala isku ogaayeen ahaa.

Darxumo, waxay ahayd Calimaax sida wax loo akhriyo ama loo qoro midna ma aqoon, haddaba waxaa jirtey warqaddii inuu u dhiibey si uu ugu akhriyo ninkii barbarkiisa midig fadhiyey, oo nasiib darri ahaa soddoggiisii cusbaa oo uu mudda yar horteed gabarta ka guursadey, lana oran jirey Sugulle.

Waxaa gabaygaas tiriyey gabayaagii caanka ahaa Qamaan Bulxan. Waxaa dhacday markuu soddoggiis warqaddii jeexay oo weertii u horraysey oo ahayd “Calimaax sidii johoradeed yaanan ku jamane” isha mariyey, mar labaadkiina ilaa erayadii u danbeeyey oo ahaa Cawrala Barre akhriyey, oy u muuqatay inay warqaaddu ku saabsan tahay jacayl ka dhexeeya Calimaax iyo ruuxaas

dumarka ah, ayaa hoosiis dhex maray warqaaddii iyo indhihiisi oo uu mar saddexaadkii naxdin iyo yaxyax daraadood dib eray uga kicin waayey.

Halkaasuu isagoo didsan soddogii ugu celiyey warqaaddii Calimaax iyadoo isku guda jirta. Calimaax waxay la noqotay in odaygii soddogiisa ahaa indha dareeyey oo uu sidaas aawadeed warqaaddii u akhriyi kari waayey. Markaasuu intuu warqaaddii ka qabtay soddogiis u dhiibay ninkii dhinaciisa bidix fadhiyey, oo ayaandarro labaad ahaa seeddigii Wacays. Wacays warqaaddii buu intuu galka ka saaray oo kala bixiyey beeg isu hor qabtay, isagoo xoogaa dareeni galay markuu aabbihii wejigiisa eegay dhididka saarsaaran. Sidii si le'eg Wacays bilawgiiba wuxuu la kulmay wax aanu filayn oo aad uga yaabiyey, waana ka bogtay warqaaddii isagoo aan weli eray uga sheegin Calimaax. Calimaax baa haddaba, dareemay inay warqaadda wax walaac geliyey soddogiis iyo seeddigiis ku qoran yihiin oo lagula dhici waayey ama lagala xishooday in loo sheego. Markaasuu ku yiri "Wacays ii sheeg waxa warqaadda ku qoran, yaase soo diray?" Wacays baa markaas u jawaaboo ku yiri, Calimaax waxa warqaadda ku yaal iyo cidda soo dirtay midna halkan kuugu sheegi maayo Soomaaliduna waxay ku maahmaahdaa "shir looma wada uunsiyo" ee waa inoo markaynu shirka ka dareerno.

Calimaax waa af gartay Wacays oo shirkii buu iska dhegeystey isagoo walaacsan oo ka fekeraaya waxa warqaadda ku qoran. Nasiib wanaag, in yar dabadeed ayaa shirkii ninkii guddoonshaha ka ahaa xiray oo gartii dhammeeyey.

Sidii ballanku ahaa markii la dareeray ayaa Calimaax iyo Wacays is raaceen, oo haddii in yar la wada socdey Calimaax yiri, “Wacays ina keen guriga aad warqaadda iigu akhridide.” Wacays baa markaas ku jawaabay, “Caliyow tanu mid gurigaagan laguugu akhriyaayo ma’ahee cidladaas inoo leexi.” Cidladay u leexdeen ayaa Wacays warqaaddii u akhriyey Calimaax.

Calimaax markuu tixdii u horraysey ee warqaadda ku tiillay maqlay ayuu afka gacanta saaray oo hareerihiisii deydeyey in cid kale dhegeysanayso. Hadduu amminkiiba gartay in waxa meesha ku yaal uu jacayl yahay asaanay ku habboonayn in seeddigiis u akhriyo, ayuu yiri, “bes! Wacaysow waa kaa dhantahay.” Wacays dheg uma dhigine warqaaddii buu ilaa dabo ilaa dacal akhriyey, markuu dhammeeyeyna intuu galkeedii ku celiyey buu jeebka shaarka ugu ridey oo ku yiri “Calimaaxoow maanta ka dib waxaasoo kale xididka hawla iman, haddii kale xaal gola jog ah baa ku qabanaaya.” Calimaax baa markaas yiri “hadduuba I hayaa oo ay tahay adigu aad joogtide inaan soddoggii xaal degdeg ah oo hoos ahaan ah siiyo.” “Aday ku jirtaa” baa Wacays ku yiri, “waayo

adoo kale wax looma sheego." Calimaax baa markaas yiri, "Wacaysow kuguma raacsani inaan anoo kale wax loo sheegi karin, waayo waxaa ii muuqata inay wax akhri iyo wax qoris la'aantu yihiin jaahilnimo weyn oo doqonnimo iyo dullinimo ku jirto. Waxaa kaloo ii muuqday maanta inay jaahilnimadu tahay gudcur iyo mugdi kaa daaha ifka iyo adduunkaba, oo dullinimo kalena aanay jirin iyada ma'ahee. Waxaa kaloo ii raaca intaa oo aan shaki ku jirin in nin kasta oo karti iyo raganimo u dhashay ay raganimadiisu dhaliilan tahay kalana dhantaalan tahay mar hadduu jaahil yahay, waxaana ii marag ah danqaarihii, ceebtii iyo nacasnimadii maanta xididka hortiisa iga raacday. Waxaanna ku leeyahay Wacaysow ninkii waaya arag ah waxbaa lagala haraaye i maqal oo weertaydan waanada ah ha sii deyn."

Wacaysow nimaan wax akhriyeyn, waafi noqon waaye,
Weeraartan madan loo fadhiyey, wadhi ka raacdaaye,
Warkiisiyo sirtiisoo dhan baa uunku weriyaaye,
Sidayduu u wiiqmaa haddana, sharaf ku waayaaye,
Sidayduu waraabaha wahtami, wax uga roonayne,
Sidayday wadartiyo yasaan, xididka waayeele,
Waanigaa waxaan warac ahaa, wegetan liicaaya,
Oo way iyo wayey wanigaa, wahantan weydooday,
Oo wax aqoon la'aantay gu wacan, inaan wadeecoobo,

Hadduu waagu nabad ii beryaan, la'I weldaamaynin
Eebbe waaxid weeyee, haddaan wed iga soo gaarin,
Wawgiyo higgaaddaan ka baran, berry wadaadkiye,
Wallaahaan ku dhaartiyo Ilaahii Waaxidka ahaaye,
Culimada wareegtaan ku oran, weylun ii dhiga'e,
Wahsanmaayo jeeraan akhriyo, weedh la soo diraye,
Waxes waanaday tahay haddaan, waaya aragoobey,
Oo aan waraaqihii jacayl, weer ka kicin waayey,

Wax bartaay wax garab baa adduun, berri la weydiine." Markuu Calimaax dhammeeyey gabaygaas uu ku tusaalaynaayey seedigiis jaahilnimadu fool xumada iyo dullinimada ay u leedahay dadka uu kuna ballan qaaday inuu aroortii waxbarasho bilaabayo, ayuu ku yiri seeddigiis "Wacaysow odaygii intaanaan isu iman xaal hoos ahaana iga sii gaarsii."

Wacays baa markaas Calimaax ku yiri "waa tahaye, illayn innaga waxba innooma kala qarsoonee, oo rag isku ayniyaynu nahaye maad xaalka iiga warrantid." Calimaax wuxuu ku jawaabay "waa runtaa Wacaysow Soomaalidu waxay tiraahdaa, nin qoyani biyo iskama dhawro, balse hadda waan siyaysanahaye mar kale haynoo ahaato oo inna keen hadhimo tagnee." Halkaasaa lays raacay iyagoo aan ninna nin la hadlayn labadoodii ilaa ay tageen gurigii

Calimaax oo halkaas lagu wada qadeeyey, isagoo haasaawihii iyo hadalkii Calimaax aad ugu yaraaday.

Siduu Calimaax ku ballan qaaday inuu waxbarto oo aan warqad dambe loogu akhriyin ayuu markii waagii beryey macallinkii dugsiga Xarunta u tegey oo inta loox la siiyey loo bilaabay alif,
ba, ta, ja, xa, mudda yar dabadeedna wuxuu gaarey heer fiican oo uu waraaqihiisa ku akhrisan karo.

Iyadoo Cawrali war iyo wacaaltoona ka weydey in Calimaax warqaaddii gaartay, hadday gaartayna waxay gayeysiisey ama badday, ayey had iyo jeer nafteeda ku samirsiin jirtey inay haddaanay maanta war ka helin, ay ka heli doonto berry ama saadambe ama saakuub. Nasiib darrise waxaa dhacday wax war ahi waa ka soo noqon waayey Calimaax, Cawralana jacaylkeedii qarsoodigii waa ka baxay oo dadkii magaalada degganaa oo dhan ayuu ku baahay ilaa labadeedii waalid iyo walaalaheedba ogaadeen.

Markii saas loo ogaaday ayaa maalintii dambe iyagoo walaalkeed Dalmar iyo hooyadeed fadhiyaan aabbeheed u yeeray oo ku yiri "Cawralaay aabbe waa maxay waxa lagugu sheegsheegayaa miyaananse kuugu ducayn ninka la yiraahdo Geelle oo laba boqol oo geela leh, sidee baad jacayl iyo wax xille ula timaaddaa oo lagaaga maqlaa. Waxaan ku leeyahay maanta ka dib waxaas iyo wax la mid ah yaanan kaa maqlin haddii kalese dayraad iga tahay

ee ogow. Waayo anigu waxaan ahay nin xishoonaaya oo aan oggolayn in markaan golayaasha tago in lay yiraahdo waa kii gabartiisu ninka jeclaatay. Ugu dambaystii waxaan ku leeyahay waa geeri baabi'inaysa gurigeenna, haddii waxaas dadku inna ku maqlo ee iska jir maanta ka dib oo yaan lagaa maqal."

Haddii odaygii dhammeeyey hadalkiisii ayaa hooyadeed qaadatay hadalkii oo tiri "heedhee, gabadha Cawrala waan ka goblamay waana layna ka beddeshay oo iyadii ma'aha, waayo waa xishoon jirtey, balse maxaa annaga iyo jacayl isu kaaya keenay, weligey waa kaas aabbahaaye ma oran waan ku jeclahay, anigu afkayga ma soo marin karo eraygaas baase, oo! oo! oo! Waa waarey gabadhani waxbay la timid oo baddii baas baa laga soo raacay."

Markay labadii waalid dhammaysteen canaantoodii ayey isaga tageen Dalmar iyo Cawrala iyadoo ilmadu ka tililikh leedahay labada indhood. Walaalkeed Dalmar baa markaas ku yiri "Cawralaay wax xun baad samaysey oo dhegtayadii baad dishey oo haddaadba nin aan dalka joogin oo meeshaas iyo Taleex jira u baaqday, haddaba waxaan ku leeyahay miyaadan maqal in aabbeheen loogu ballan qaaday boqol geela oo baarqabkoodii ku doobinaayo iyo wax alla wuxuu doono oo yarad ah.

Haddabam ha nacasoobin oo hanna jabin oo hanna waasiin xoolahaas aanu qaarkood gabbaati u sii qaadannay kaliishii

dhoweyd. Midse waan kuugu garaabayaa oo waxay tahay ninkii badda kaa soo saaray wax loo abaalgudo waa yahay, hase ahaatee ninka hadda Xarunta iyo Taleex jiraa muxuu kaa ogyahay, iska illow oo danahaaga ka raac. Tu kale waxaan maqlay inaad gabaydide bal anna i maqal waxa ku hayaan weer ka oranayaaye.

Cawrala Barraay Calimaax, calan laguu saarye,
Wuxuu kaaga cararayba, waa cabashadaadiiye,
Cureejaa laguu dhigi lahaa, kun iyo caycayne,

Cood baa laguu dhaqi lahaayoo, ma caddilaanteene,
Cayaaraa laguu tumi lahaa, cis iyo maamuuse,
Cawadaada eed wadigii, been cawaansadaye,

Cawralaa markaas ku tiri walaalkeed “horta Dalmaroow adigaa iiga dhow aabbe iyo hooyo oo aad moodda inaad in yar garasho u leedahay jacaylkan i haya, balse inta kaa dhimanna aan kaa dhaadhiciyee i dhegayso.

Dalmarow warkaagii dabeebtaadi heesaha
I durtoo i damaqdoo
Doqoni sokeeyiyo dulmar hadala seegtoo

Dacalkiyo agteedaa loo dalag dhigaayoo
Anse daaqsin geel baad iigu dabartay maansada
Wuxuu hadal dux leeyahay daliilkiisa sheegtaye
Bal wax kaa dahsoonaa aan debinta saaree
Ha u qaadan deelqaaf

Waa doog jacayloo waa dab iyo naaroo
Waa danab sidiisoo waa walax dadyahanoo
Waa dabaylo gaaroo anna ma doonan heedhee
Dar alluu ka yimiyoo malag duulayaa siday
Isagaygu duraayoo i dul keenay maandhow

ma dow baa walaalow inaad igu dagaashaa?
Duunyo layga doortaa urug aan deddoodaa

Waa doog jacayloo waa dab iyo naaroo
Waa danab sidiisoo waa wax dayahanoo
Waa dabaylo gaaroo diirkiyo laftuu xulay
Beerkuu dalooshaday feeraha dareersani
Wey wada damqanayaan darbaddiyo xanuunkaan
La daalaadhacayaa

Haddii deeq laguu dhigo damcaddeed saluug tahay
In kastay dulbaaxiyo darib saafi ay tahay
Ogoobay dul hoos uurka uma degaysoo
Waa dacar qaraaroo waa timirta doocaan

Waa doog jacayloo waa dab iyo naaroo
Waa danab sidiisoo waa walax dadyahanoo
Waa dabayla gaaroo dawadiisa waayeye Ma
aroos daadduucaan dullinimo u yeelaa?
Mise daad i qaadyey duurgal baan ahaadaa?
Dugaaggaa habqamayiyo deeradaan la dersaa
Ma duulaaye Mariskaan[1] i daadahee iraahdaa?
Diirad buu wataayoo dalkuu waayo tegey baan Ii
dawi iraahdaa?
Daayinow Allahayow Adaa daa'imaayee
Inta dunida maanta ah dabiibkay na kulansii.

Shimbirka Mariska la yiraahdaa waa shimbirka dadka u horkaca meel uu malab soo arkay, ama meel libaax fadhiyo

.

# DUULLAANKII DARAAWIISHTA EE "BADDACAS"

Mar loo malaynaayo inay taariikhdu qiyaastii ahayd bishii Nof. 1916kii ayaa Seyidkii duullaan uu magaciisa qarsooni ahaa "BADDACAS" oo uu xeeladdiisa dejiyey markuu muddo dheer dersaayey ku saaray xeebahaas Maakhirkoost.

Maakhirkoost waxaa lasyku yiraahdaa magaalada Xiis, Laasqoray, Maydh, Ceelaayo, Qaw iyo Boosaaso.

Duullaankaas waxay tallaabadiisa labaad ahayd marka magaalooyinkaas daraawiishtu qabsato, inay isla markaas gacanta ku dhigaan waxa doonyo marsooyinkaas dhigan. Doonyahaas waxay daraawiishtu la damacsanayd inay ciidan ku gurto oo markaas Baddacas kaga gudubto ilaa magaalada Cadmeed, dabadeedna ciidamadii Ingiriiska oo halkaas fadhiyey ku soo baabiyaan iyagoo warmaqabto ah.

Haddaba, bacdamaa Calimaax ahaa ninkii Cadan soo ilaaleeyey meelihii ciidamada Ingiriisku degganaayeen, isla markaasna uu ahaa nin badaha aqoon dheer u leh, wuxuu amar hoose ku qabay, isagoo abbaanduulihii keliyi la ogyahay in mar alla marka la

qabsado magaalooyinkaas uu ciidan u gaar ah oo soomajeestayaal ah doonyihii ku guro, oo kaga dejiyo habeen labaadka buurta la yiraahdo Jabalshamsaan dhankeeda cadceed ka soo bax, halkaasna uu weerar kaga qaado ciidamadii Ingiriiska intaan waagu u beryin.

Ciidamadii Daraawiishtu waxay ka baxeen Taleex taariikhdaas sheegan iyagoo toobinka haya, wuxuuna ciidankaasi u kala baxsanaa saddex madax. Madaxa hore waxaa la oran jirey Maarraweyn wuxuuna ka degey dhabbada Tabca isagoo beegaayey Xiis, Maydh in Conqor. Madaxii labaad oo ahaa

Indhabadan wuxuu ka degey Geeldoora isagoo beegaayey Laasqoray, Ceelaayo iyo Boosaaso, kii saddexaad oo ahaa Garboh wuxuu ka degey laba dhaxaaddii labadaas ciidan u dhexaysey ee dooxada Jiidali ku beegan.

Haddaba, Calimaax wuxuu ka tirsanaa ciidankii labaad ee Indhabadan la oran jirey, beegayna dhanka ugu bariyeysa. Sida la ogsoon yahay ciidamadii Daraawiishtu toddoba maalmood bay ku qabsadeen magaalooyinkii xeebaha kuna baabiyeen ciidamadii gumaystaha iyo kuwii la socdey.

Waxse nasiib derri ahayd oo fuli weydey xeeladdii duullaanka tabatabaynteedii labaad oo ahayd in doonyaha marsooyinka

dhigan oo dhan gacanta Daraawiishti ku dhigto oo magaalada Cadmeed ciidan loogu gudbiyo.

Taasna waxaa u sabab ahaa dadkii doonyaha lahaa oo Daraawiishta ka soo horjeeday, ayaa markay u caddaatay inay jabeen berrigiina lagaga adkaaday la baxsaday doonyihii, iyagoo u qayla geynaaya Ingiriiskii Cadan iyo Berbera fadhiyey.

Sidaasay ugu suura geli weydey madaxdii Daraawiishta tallaabadii labaad ee xeeladdii duullaanka "BADDACAS" oo ahayd tii u weyneyd oo uu ugu dambaystii Sayidkii dhigay Calimaaxna la rabay inuu fuliyo oo ka gudbo Baddacas isagoo ciidan xoogel doonyo ku sida abbaarana soona baabiyo Ingiriiskii uurada lahaa meeluhuu ka soo duuli jirey. Waxaa dhacday in Cawrali kala qayb gashay dagaalkii ciidankii kowaad ee
Maaraweyne oo qabsaday magaalada Xiis iyada iyo geeladeed Saluugla oo mar alla markay maqleen Daraawiish baa soo gashay magaalada ay marada dhexda ku duubteen oo mashxarad hareerta kala raaceen ciidankii.

Cawrali dagaalka waxay uga qayb gashay oo wacdaraha u dhigtay laba hal. Tan u horraysa iyadoo garansanayd inay Daraawiishtu gobannimada dadka Soomaaliyeed iyo diinta

Islaamka ka ilaalinaysey gaalada. Tan labaad iyadoo intay dagaalamaysey misana Calimaax ka baareysey inuu ragga ku dhex jiray. Waxse ayaan darri ahayd inuu raacay ciidankii saddexaad ee dhanka ugu bariyeysa ka degay oo Laasqoray, Durduri, Lasmacan, iyo Ceelaayo qabsaday.

Inay saasi jirtey oo Calimaax ciidankaas raacay waxaa u sheegay Cawrala markii gaaladii laga guuleystay Darawiish Bile oo uu farriin u dhiibey. Jaalle Bile wuxuu u yimi Cawrala gooray fiid hore weli tahay, iyadoo gurigoodii debeddiisa fadhida oo Saluuglina ag taagan tahay. Wuxuu Bile yiri, “baayooyin ma ii sheegi kartaan gabadha la yiraahdo Cawrala?” Markaasaa Cawrali tiri “maxaad u rabtaa?” Wuxuu Darawiishkii Bile ugu jawaabay, “farriin degdeg ah baan u sidaa ee midkiinna ma tahay?” Cawralaa markaas fadhigii ka so boodday oo tiri “xaggee baad uga siddaa waa aniga eh?” Wuxuu ku yiri markaas “yaad ka filaysey oo Xarun kaa jooga?” Waxay tiri “waa layga jiraa ee ii dedeji farriinta.” Halkaasuu Darawiishkii ku yiri Cawrala “wuxuu Calimaax afka iga soo faray salaam iyo mahad badan. Wuxuu kaloo yiri waxaad ku tiraahdaa Cawrala waad ku mahadsantahay warqaaddaadii macaanayd oo habka iyo hannaanka wanaagsan u qorrayd. Wuxuu kaloo intaas ku daray inaan kuu sheego in kastoo warqaaddii dhibaatooyin iyo danqaaro gaarsiisay, akhrigii ay u akhriyeen dad ay isku xilleeyihiin misna wuu quuri waayey

murtideedii macaanayd oo wuxuu u xirtay sidii qardhaaseed intuu gal gashey, intaas wuxuu ku daray inaan kuu sheego inuu kuu imanaayo mar alla marka gaalada laga adkaado oo Maakhirkoost Ingiriiska laga saaro, iyo salaam kashiisa iyo laabtiisa ka soo go'day.

Haddii Darawiishkii Bile uu dhammeeyey farriintii ayay Cawrala ku tiri "walaal Darawiish gartay farriintiiye maxaa magacaaga la yiraahdaa? Maxaadse kaloo iiga sheegi kartaa ninka farriintaas kuu soo dhiibey?" Darawiishkii Bilaa markaas yiri "horta intaanan war kaa siin ninkaas, ma waxaad tahay gabadhii u soo dirtay xaashida jacaylka?" Cawralaa tiri markaas "maxaa adiga ku ogeysiiyey xogtiisa iyo xaashida jacaylka?" Wuxuu ugu jawaabay "oo taas magaratada Xarunta joogta oo dhan baa oge ceeb weynina waa ka gaartay oo xaal baa lagaga qaatay. Haddase sidaan isku ogayn wuxuu damacsan yahay marka dagaalku joogsado oo la curyaamiyo gaalada inuu kuu yimaaddo haddii uu bedqabo."

Cawrali waxay ka walaacday warkaas uu u sheegay ninkii oo xaashideedii ku saabsanaa, isla markaas waxaa werwer sii gelisay sababta Cali u soo raaci waayey ciidankii Xiis. Haddii laba caanamaal Daraawiishtii u dabbaaldegaysey guushay heshay ee ka heshay Ingiriiskii oo Maakhirkoost oo dhan ka saareen, ayuu Cawrala u yimid goor ay tahay fiid hore Darawiishkii Bile isagoo

war dhiilla ah u sida. Warkaasoo ahaa inuu Calimaax ku geeriyooday meesha la yiraahdo Gurifaras oo Calmadow ah. Cawralaa markay warkii maqashay gambarkay ku fadhidey kor uga booddey oo tiri “Bilow! Ba’ayeeym Bilow ba’ayeey war warku ma yahay mid sugan?” Markaasuu ugu jawaabey “loo noqon maayo, waayo waa war rasmi ah oo waxa laga soo weriyey Taliskii bari qabsaday inuu Calimaax ka mid yahay raggii jannaw oo jahaadka ku dhintay, oo niman raacda reeb ahi gorodda ka gooyeen.”

Halkaasaa Cawrali ku barooratay, iyadoo gacmaha madaxa ku haysa oo leh:

“Calafkey go’yey Cali waayayey, oo
waaniga cidlada caawdaa fadhiyoo,
cishqigii i helay la caraancaroo,
calafkay go’yey Cali waayayeey, oo
Caligaan jeclaa u calaacalee,
anoo ciid galaa caynkan iiga roon,
calafkay go’yey Cali waayayey, oo
cadawgii helaa ciil iga hayaa,
Calafkey go’yey Cali waayayey

In cabbaar ah markay Cawrali barooranaysey ayaa geeladeed Saluugli u timid oo isku dayday inay aamusiiso, hase ahaatee way kari weydey, markaasaana Cawrala hooyadeed intay aad iyo aad u qaylisay tiri “naa aniga gurigayga iiga bax oo la aad oohintaada meel baas iyo meel daran iyo reero muskood.”

Halkaasaa Saluugli kaxaysatay Cawrala markii gurigii laga cayrshey, iyadoo ku sasabaysa inay aamusto oo ba’ayda iyo baroorta iska dayso. Saluugli waxay damacday inay geyso gurigoodii, laakiinse Cawaralaa diiddey oo ku tiri “Saluugla waxaan kaa codsanayaa inaad dad oo dhan iga fogaysaa oo aad i geysaa badda agteeda halkaynu habeenkii dhoweyd fadhiney.” Saluugli sidii bay yeeshay oo meehsii cammuudda tamuuxa ah lahayd badduna in yar u jirtey oo ku soo faaxaysey bay geysey.

Markii goobtaas la fadhiistay oo in yar la joogey ayaa Saluugli tiri “Cawaralaay Soomaalidu waxay tiraahdaa geeridu waxay ku wanaagsan tahay geel jire iyo nimaadan aqoon.” Cawralaa tiri “waa runtaaye Saluuglaay bal i dhegayso:

La  yee Cali baa geeriyoodoo go’ay,
La yee gorodday ka gooyeen,
La yee geesigii godkow hoyayeym

La yee Guudmanaa ayaa la dhigoo
La yee gorgorkiyo haadkaa gigayey,
La yee gaaladii ayaa gambashee,

Isagoo galow xamar ku gaardiyo oo,
Guutadii heeganayd guubaabinayoo,
La yee gadaal bay ka gaadeen,
Mar hadduu go'ay geesigii Maax,
Goorteer aanan nolol ku gaarayn,
Allaylee gacal waayee aan go'o,

Markay baddu guuxday gugii tegey,
Daruur gudgudene geb soo tiri,
Cirkiina guguc iyo hillaac galay,
Oo mawjada gudbanoo garaangarani,
Doonnidii soo galeen gol iyo hoos,
Oo go'aydu yeertay goonyaha,

Gargaarkuu i gargaari anoo go'ila I garab galay gelin dhexaadkii Iyo guudkuu igu qaaday baan gocan,

Abaalkuu ii galay anaan gudinoo,
Godolna haasaawin ayuu go'ay,
Allaylehe gacal waayey aan go'o,
markuu gugu da'o geelo ramag yahay,
galool ubax laan lahaa geeyoo,
garoorka ku sii gammun culan,

guur iyo waxaan lahaa aroos gala,
guri aan ilaxidhaan lahaa geeyoo,
gogosha u dhigilaa dugaha hore,

wayey gaaladeer hadmaan ganiyoo,
wayey godobtay hadmaan gudanoo,
gaydhaan qabo goormaan ka gaylami,

abaalkuu ii galay anaan gudin,
godolna haasaawin ayuu go'ay,
allayle gacal waayey aan go'o,

go'aye jacaylkaygi geeryoo,
oo garkiyo wadnahaa i kala go'an,
ma goob leelleel baan gondaha dhigay,

dar aan I gayeen u gacan galay,
guuldarro ku mutaystay geel badanoo,
guunnimaa iiga roon geddaan ahay.

Intay Cawrali heeseysay Saluugli waa dhinac fadhidey iyadoo xagna ka yaabban xagna ka naxaysa uguna barowdiiqaysa deddada iyo diifta haysa Cawarala, waxayna ku tiri markay heesii dhammaysay "Cawralaay Ilaahay samir iyo iimaan ha kaa siiyo ninkaas ee ina keen hoyanne." Markaasaa Cawrali ugu jawaabtay "waa tahaye horta waa xumadaysnahay waxaad ii keentaa koob biyo qabow ah, halkanaan kugu sii sugayaaye." Saluugli sidii bay yeeshay oo magaaladii bay koob biya ah uga doontay.

Haddaba, hadday in yar ka sii maqnayd ayaa Cawrali circa ka maqashay cod macaan oo leh:

"Cawralaay ma geeryoodo nin geesiyi, manuu
go'o hadduu gobdoon yahay, oo gumeystiyo
gaalo weetayn,

Cawralaay ma geeriyoodo nin geesiyi,
Geyigiisa xornimo u goobaayoo,
Gardarada ka diiday goboray,

Cawralaay ma geeriyoodo nin geesiyi,
Galow iyo geenyo heenseeyo,
Golisna ku rafaadshay gaalada,

Cawralaay ma geeriyoodo nin geesiyi,
Gaashaanka ku qaatay gacan bidix,
Oo gamaska ku riddeeyey gol midigtii,

Cawralaay ma geeriyoodo nin geesiyi,
Gaajada iyo diiday gunnimadii,
Oo galtidii timi guban ku cayrsaday,

Cawralaay ma geeriyoodo nin geesiyi,
Gumeystaha guluf ku weeraray,
Ka guuleystay gooshiyaal badan,

Dayaxu ma gabdhin maanu gabax oran,
Ha yeeshee gashuu degey way guduudnayd, Ee ha gacan gelin jeer gu' soor da'o."

Habeenkaas, dayax buuxa oo ifkiisa iyo kaahiisu taam yihiin baa jirey oo mar alla markay codkii macaana oo circa ka yeeray

maqashay, oo ayse u kala garan weydey waxa heesaayey dad iyo jinni miduu yahay, ayey fadhigii ka kacday oo beeg u sara joogsaday, iyadoo hareeraheeda iyo guudkeeda daydayeysa, markaasay tiri “war yaa ila hadlaaya? War yaa ila hadlay?” Markaasaa isla codkii ugu jawaabay “waa Cirsan-ka-yeer.” Halkaasay Iyana tiri “Cawadada helay ee maad ii timaaddid oo si fiican iigu warrantid?” Wuxuu markaas ugu jawaabay inuu warkiisii ku kooban yahay saddexda tixood oo u dambeeyey heestiisii. Haddaba in kastay dhowr jeer la hadashay oo su’aalo ku celisey wax jawaab ah kuma celin mar dambe Cirsan-kayeerkii.

Gooray walaacsan tahay cabsina gashay oo ay isku deyeyso inay xasuusan tahay erayadii lagula hadlay weliba saddexdii weerood oo u dambeeyey ayaa waxaa u timid Saluugla oo biyihii u sidda. Saluugli waxay aragtay inay Cawrali siyeeysantahay oo dhididsan tahay oo sidii wax kale ku soo kordheen sisaanyaheed leh.

Cawralaa, Saluugla ku tiri markay oon baxday “Saluuglaay haddan wax kuu sheego waxaad oran doontaa waxbaa kuu dhiman oo i rumaysanmaysid.” Halkaasay uga sheekaysay waxay la kulantay oo dhan, inkastaanay tixihii u dambeeyey oo ah kuwii gaar ahaan loo xusuusiyey sheegin, hase ahaatee siday u sheegtay hortiba may rumaysan warkeedi Saluugla. Markay sheekadii u dhamaysay ayey Saluugli ku tiri “waxaan u malaynayaa inaadan dhamayne ee ina

keen waa goor dambe'e aan hoyannee." Halkaasaa lays raacay oo la gurya tegey goor ay ku dhoweyd saqdii dhexe.

# DHAAWACII IYO DHIIGKAFUQII CALIMAAX

In kastoo la yiri Calimaax waa geeriyoodey, ciidankiisiina sidaas ku tiriyeen markii la waayey, raggii ugu war dambeeyeyna oo ay goobtii Gurifaras ka wada dagaalamayeen sheegeen in rasaasi ku dhacday oo uu dhaawac ahaa markii ugu aragti dambaysey.

Hase ahaatee, Calimaax ma dhiman wuxuuna nasiib ku lahaa in kastoo la dhaawacay rasaastii kagama dhicin meela halisa, ee waxay kaga dhacday garabka bidix hoostiisa iyo bawdada, isla barbarkaas ah oo kala jabtey.

Waxaa dhacday inuu dhabibey oo aad u dhiig baxay, waxaana dhacday in koox ka mid ah colkay Daraawiishta dagaallamayeen ay dul yimaaddeen oo nin ka midihi isku dayey inuu warmeeyo, waxse ka hor joogsadey mid kale oo ku yiri "ar nacallaa kugu yaalle raga lama bakhti wareemo hadday geeriyoodaan ee ninka dhaaf." Halkaasaa looga tegey meyd ahaan isagoo miyir la oo taag daran dhiigiina ka soconaayo. Gooray haddaba cawaysin tahay ayuu intuu soo miyiraabey maqlay waraabihii maydkii agihiisa cunaayey cidiisii iyo faraxadiisii, halkaasuu intuu go'iisii kala goostay bawdada ku xirtay oo u guurguurtey geed Dhamasa ah hoostiis. Markuu geedkii galay buu tooreydiisii la soo baxay oo midigta ku qabsaday si uu haddii waraabuhu ama bahaluhu kuwo

kasta ha ahaadee soo weeraraan iskaga celiyo, waayo buntukhiisii maara gaabka waa laga furtay, hadduu haysan lahaana waxba kuma ridi kareen gudcurkii iyo gacanta midig keli ahaanteeda aawadood.

Intay fiidaddawgii hore ahayd ma baqayn, laakiinse waxaa cabsi iyo baqdin gashay markii, dhidarkii, weerkii, shabeelkii, waraabihii, iyo habar dugaag oo dhammi hareerihiisa isku eryoodeen oo kala gurxameen marmarna intay iyagoo is baacsanaaya ag yimaaddaan dhereg daraaddeedna hadba codad kala jaad ah iyo mashxarad ku dhifteen. Isagoo sidii geedkii ugu jira ayaa waagii ugu beryey, markaasuu si fiican isu eegay meeluhuu ka dhaawacmay, kuwaasoo uu arkay inay yihiin garabka bidix hoostiisa iyo lugta la barbar ah oo bawdada ka kala jaban.

Halkaasuu qori Dhosoq ah kala jabsaday oo go'iisii sare laba u kala jeexay oo labadii jab oo qoriga midna hoos mariyey kii kalena dul mariyey bawdadii jabtay oo ku duubay jeexii marada. Dhiig baxii uu dhiig baxay maalintii la dhaawacay waxaa ugu biiray oo ugu darsamay gaajo, harraad, cidla, ciirsi la'aan iyo wakhtigoo aad u kululaa oo kaliil hogad horraantiisa ahaa.

Haddaba, goor uu liito oo uu yahay tii u dambaysey ayaa Ilaahay abbaara afartii saac ee galabnimo xaggiisa hogol dul hojey. Halkaasuu bartii roobkaa isu dhigay, markii roobkii qaadayna uu u guurguurtey iliil biyo marayeen oo ka cabbay kuna mayrtay dharkiisii, dhiigiina intii ku qalashay iskaga rogey. Intaan roobkaasi u di'in ka hor wuxuu ku jirey halis oo waaguna nolol uguma beryeen.

Galabtii markii roobku u da'ay oo uu aad u nafisey ka dib ayuu gaajo iyo baahi dartood intii geedaha geed hoose ahayd ee mirohooda la cuni jirey mirasytay, qaarkoodna in kastay qaraar dhadhamaayeen caleentoodii cunay. Intaan gabbalkii dhicin, habeenkiisii labaad oo uu dhaawaca ahaa ayaa waxaa uu muuqatay in geedkuu habeenkii hore galay meel halisa ku yaallo markaasuu hoos tegey geed kale oo meel in yar ka korraysa kii hore ku yaalla.

Bacdamaa habeenkii hore nabaradu caradhaban ahaayeen xanuun iyo kaar badan laguma qaban, hase ahaatee habeenkii labaad ayaa kaarkoodii ku soo baxay oo uu laba indhood isu keeni waayey ilaa habeenkii saddex dalooloo laba dalool tagtay. Sidii habeenkii hore si le'eg ayaa habeen labaadkiina habar dugaad wixii Cal joogey oo dhammi isugu habar wacdeen, oo uu mararka qaarkood codadkoodii iyo cidoodii kala kasi waayey jaadadkay

ahaayeen. Wuxuu keliyoo ka gartay codkii libaaxa, shabeelka, waraabaha iyo dhidarka inay ka mid ahaayeen habar dugaagga meesha isugu yimid.

Haddii waagii u beryey maalin labaaddii goor barqa ahna ay tahay uuna iska ladan yahay, gaajose hayso ayaa waxay ishiisu ku dhacday hal sagaara ah oo geed agtiisa ah caleemaysanaysa. Halkaasaa waxaa u muuqatay sida keliya oo uu sahal iyo dhuuni ku helayaa inay tahay sagaaradaasoo uu dabto. Markaasuu saddex geed oo caleen iyo daaq fiican leh kuna dhowaa kay daaqaysey mid walba intuu uuba ka hoos qoday laan dayr u dhigay oo markaas in yar ka durkay.

Gooray cabbaar ka dambaysey markuu dabinada dhigay ayuu isweydiiyoo yiri “haddii Ilaahay waa karaaye uu kuu dabo hal atoora ah bal maxaad ku bislaynsan? Markaasuu intuu isla faqay isugu jawaabay waxay ka dhigan tahay quud aan jirin qoryo u guro, horta ha gasho talo waad heliye.”

In ku qiyaasan hal saac ka dib markuu dabinada dhigay ayu wuxuu xaggoodii ka maqlay wis-wis-wis-wis! Oo jalleeciddii uu aaminkiiba jalleeccay arkay hal sagaar ah oo dabinadii midkood ku rafanaysa. Halkaasuu isagoo dhutinaaya oo boodaalaysanaaya, kilkilada bidixna qori ugu jiro intii kartaankiisu ahaa degdeg u

rooray oo qabtay sagaaradii dabinka gashay, wuxuuna ahaa hal atoora oo aad u shilis. Markaasuu markiiba intuu jahada u jeediyey bisinka u qabtay oo bireeyey. Haddaba markuu gawracay oo qalay hilibkiina kala dhigay ayey ku caddaatay suu yeeli lahaa, inuu ceedhiinka hilibka ku cuno iyo inuu bisleeyo, si kastaba haw bisleeyee.

Isagoo haddaba, Calimaax ahaa nin yaraantiisii geel jire iyo bulsho fardood ku soo koray, ayuu dib u xusuustay waaya aragnimadiisii oo ahayd hadday mindi waayaan geel jiruhu inay dhagax Dhuxunka ah kala jebin jireen oo markaas kala jabka xanaftiisa ku gawrici jireen nirgaha iyo awrta Afkuxuublaha ah.

Iyadoo misana sida la og yahay Soomaalidu la tashato suugaanteeda iyo murtideeda markay xaajo qaraaraato ama murugto, ayaa waxaa maankiisa ku soo dhacay markuu aad uga fekeray siduu dab u heli lahaa maahmaahdan ah "nabad doon iyo cuqaal iyo culimo u dir haddaad ku wedyo waran caaraddii waa lagama maarmaan, dab doon oo aroos iyo aqal umuleed ka day haddaad ka weydo madagi waa lagama maarmaan."

Xusuustaa uu xusuustay madagta ayuu hareerihiisa ka daydeyey dhirta madagta lagala baxo oy ka mid yihiin Dhaloosha, Dhicirta iyo Mareerka. Haddaba, nasiib wanaag waxaa dhacday inuu

ammankiiba geed afar tallaabo u jira oo Mareer ah helay oo ka soo goostay laan qallalan oo uu madagta kala baxo.

Iyadoo haddaba, sida la ogyahay uu bawdo ka jabnaa madagtuna marka dab lagala baxaayo ay u baahan tahay in labada dacal ee qoriga hoos loogu qabto labada lugood, ayuu wuxuu soo qaatay dhagax weyn oo dacal ka saaray qorigii, dacalkii kalena lugtiisii midig ku adkeeyey. In yar dabadeedna wuxuu kaga soo tuuray madagtii dhuxulo ololaaya. Halkaasuu hilibkii atoorkii shishlaa dhamaca saaray oo luqmaddii u horraysey muddo lix iyo soddon saacadood ah ku dhadhamiyey. Waxaa jirtey inuu dhuuni qabatoobey oo wax badan hilibkii ka cuni waayey, hase ahaatee intuu wada bisleeyey buu intii hartay qori ku taxday oo geedkiisii la hoos tegey.

Galabtaas wuxuu ka carraabay geedkuu hore ugu hoyan jirey, wuxuuna u degel rogtey god agtiisa ah oo uu yaraantiisii aqoon jirey.

Habeenkaas amminkiiba waa ga'may, laakiinse goor habeenkii saddex dalool oo laba dalool tegey ayuu wuxuu maqlay sanqar iyo wax shamshamax leh. Tooraydiisii xiiraaga ahayd ayuu intuu midigta ku qabsaday gacantiisii bidix oo dhaawac ahaydna go'iisii ku duubay si uu ugu tabaabulshaysto wax alla wixii soo weerara. Siduu ka werwer qabay in yar dabadeed ayaa wax ku soo booday shabeel dadyahan ah, haddaba, mar alla markuu ku soo booday oo uu ku habsaday ayuu gacantiisii bidix oy maraud ku duubnayd afka u geliyey tii kalena toorraydii kaga dhiftay halkaas haabka ah oo nuftu ka dhowdahay, oo intuu hoos ugu jeexay uurkujirtii amminkiiba ka soo ridey, isla mar ahaantiiba naftii baa shabeelkii ka baxday, isagoo aan wax badan Calimaax yeelin. Goortuu ogaaday inuu mayd yahay ayuu doc isaga tuuray isaga oo uurkujirtiisii ka soo daadatay oo dusha kaga dhacday.

In yar hadduu laba legdoonaayey oo hurdo haba yaraatee u iman weydey, ayuu wuxuu soo xusuustay qardhaastii gacantiisa bidix ku xirnayd. Qardhaastaasoo ahayd warqaaddii gabayada jacaylka ahi ku qorraayeen oo Cawrali u soo dirtay markuu Taleex joogey, dabadeedna uu quuri waayey murtidii ku qornayd macaankeedii oo uu markaas u dahaartay sidii qardhaaseed, gacantiisa bidixna ku xirtay si uu weligii u sito. Haddaba, qardhaastii buu ka soo furay gacantiisii bidix oo intuu is hor qabtay ma furine maanka ka akhriyey gabayadii oo tixahoodii aad u damqeen markuu isu eegay

waxay ugu ballan qaadday iyo wuxuu cawadaas u baahnaa. Isla markaas wuxuu ka dhadhamiyey gabayadeedii mid ka mid ah oo ku soo dugaayey "aasadan caloosha igu hayn Caliyow yeelkaaha." Inay guhaantay Cawrali. Markaasuu gabaygan tiriyey oo uu xagna jacalkuu u hayey Cawrala ku muujiyey, xagna siduu ugu baahnaa habeenkaas waxay ugu ballan qaadday, isla markaasna ku tusaaleeyey inay geeridiis xalaal tahay oo uu jannada mutaystay, oo shaki la'aanna gelaayo mar hadduu u geeriyoodey dalkiisa, dadkiisa, iyo diinta Islaamka isagoo u dagaallamaaya, wuxuu yiri:

Ciqaabtii adduunyada, hadday caasha kugu keento,
Naftu ceelyo weeyee, haddii lagugu caansiirsho,
War calaacalkiyo waydu, waa doqon catawgeede,
Mar haddaan caqiidadii Daraawiish, cudud ku taageeray,
Oo aan ku ciidamay dalkoo, cadaw ka weeteeyey,
Oo aan ku cayrsadey kufriga, badaha cawnkooda,
Oo aan caaramuuslaha la helay, caasi iyo tuuggag,
Ku cagaajey meel rabada iyom, calaha guudkooda,
Wallaanaan u ciil qabin, haddaan cawdan geeriyoodo,
Haddaan caafimaad helo, Ilaah cidihii ii geeyo,
Oo aan Cayn iyo Nugaal tagiyo cagidi Dhooddeeya,
Cis iyo waxaan helehayaa, caleemo lay saaro,
Haddiise waraabaha ciyayoo, caga juglaynaaya,

Iyo caarcaarlahii shabeeloo, Eebbe iga caynshey,
Iyo coofadhlaheer libaaxoo, camal higgoonaaya,
Intaasoo cartami bahala, oo cirifyaday joogta, Iyo cuur kaloo weheliyoo, ila cawaynaaya,
Ee cunay raggii daadsanaa, cadayo hoostooda,
Haddii Eebbe calaf iiga dhigaan, cidiga soo gaarin, Oy caara dhuubta miciyeed, cadiyo jiir goyso,
Haadkuna cubbeyada hartay, ciddi ku heeraansho,
Oo aan colaad iyo jahaad, carrigow geeryoodo,
Oo aan calanka Soomaaliyeed, caanyada u diiday,
Way cawiyo Ayaan, iyo jannada, carafka weyneyde,
War caawa calooshiyo qalbiga, cudur haya weyne,
Carrab laabka guhaankii ahaa, Caliyow yeelkaaha,
Waa kaa aan la cirinciirayaa ciirsi li'idaye,
Waxeer aan cabsideer ku jiroo caaro dhabanaayo,
Haddeeray i caawimi lahayd, canab la mooddiiye,
Allow yaa cidladaan fadhiyo Cawrala ii keena,
Waxeer aan sidii cood riya'a caleenta quudaayo,
Haddeeray igu cashaysiin lahayd codcodkii dayreede,
Allow yaa cidladaan fadhiyo, Cawrala ii keena,
Cishaheer hadday sarar cusbale igu cashaysiiso, Oy cagaha ii duugto waa, gaari camalkeede,

Ciyoon baan u dhiigfuqi lahaa, caatadaan ahaye,
Allow yaa cidladaan fadhiyo, Cawrala ii keena,
Allow yaa cidladaan fadhiyo, Cawrala ii keena,
Allow yaa cidladaan fadhiyo, Cawrala ii keena,

Goortii qoraxdii soo baxday ayuu shabeelkii haraggii kala baxay oo xayrtiisii isku shafshafeeyey, hilibkiisii sagaaradana wax ka cunay oo biyo u doontay ceelkii roobku biyaha geliyey. Haddaba isagoo maalin tobnaadkii ceelkii ka cabbaaya oo haraggii shabeelka gashan, ayaa riyo meesha yiqiin oo doonaayey inay ka cabbaan ceelka isa soo dul taageen. Riyihii baa haddaba ka diday markay arkeen ninka meesha fadhiya. Gabar riyaha jirtey oo shan iyo toban jir ah, baa waxay mooddey inay riyuhu bahal arkeen oo ka soo dideen. Halkaasay ku roortay meeshii foolkooda ahaa oy ka soo laabteen. Waxay aragtay nin ceelkii biyaha fadhiya, oo gar weyn leh timuhuna aad ugu baxeen, qaarka sarena ka qaawan oo sansaan bahal leh, oo aad qaarka hoose shabeel mooddid.

Waxay kaloo aragtay inuu ninku siyeysanyahay oo dalanbaabiyaayo markuu istaago. Isaguna araggii uu arkay riyaha ayaa naf iyo nolol ugu horraysay, markay gabadhii u muuqatayna waa ku sii farxay oo wuxuu u holladay inuu xaggeedii u ordo, waase kari waayey. Wuxuu ku yiri gabartii “gabarey maxaad

sheegtay? Hana iga biqine ii kaalay oo gacan i sii waxaan ahay nin dhaawac ahe." Gabartii cabsi weyn baa ka gashay Calimaax siduu ahaa, markay eraygiisii u horreeyey maqashayna taftay qabsatay oo cagta rogtey, iyadoo riyihii cayrinaysa oo leh "ba'ay oo ba'ay kanu waa bahal! Ba'ay kanu way cunin, ee aan isakaga tago!" ilaa ay ka libirtay.

Calimaax wuxuu damcay inuu ka daba tago, hase ahaatee way u suura geli weydey, sababtoo ahayd waxay ka degtey dhul jarar oodan ah, ee uusan mari karayn. Halkaasuu ku niyad kacay isagoo iska laasimay cidladiisii aragtidii uu arkay gabartii, oo uu misana hanan waayey inay la hadasho oo gacan siiso ugana miciinto meeshuu fadhiyey darxumadeeda.
Haddaba, in kastoo gabartii ka carartay Calimaax aragtidiisii horee, waxay ahayd qof waracad ah oo way qayla roor tagtay, ilaa rag iyo haween loo soo gurmadey oo halkii rabrab lagaga qaaday oo guryihii beesha la geeyey.

Wax rag ah oo muqdar ama xilkas ah waxaa beelaha joogey nin la oran jirey Warsame Warfaa. Warsame ayaa habeenkiiba u loogey Calimaax, aroortiina waxaa loo keenay nin bowdadii ka kaba oo aqoon fiican u lahaa sida wax loo kabo.

Markay hadhimadii ahayd oo Calimaax dhibaatooyinkii qabsaday warkoodii dhammeeyey, ayaa Warfaa wuxuu Calimaax uga sheekeeyey sheekooyin badan oo waaya aragnima ah, isagoo uga jeedey inuu illawsiiyo Calimaax dhibaatooyinkii uu la soo kulmay.

Wuxuu yiri Warfaa "Calimaaxow waxaa la yiri dumarna badhaadhahooday ka sheekeeyaan ragguna ba'iisuu ka sheekeeyaa. Anigaynga kula hadlaaya haddaan kaaga sheekeeyo waxa beri i qabsaday, taadani biyey noqon lahayd." Cali baa markaas yiri "u malayn maayo inay taydanoo kale ku heshee, balse aan isu eegnee bilow sheekadaad sheegaysid Warfaayow." Warfaa baa markaas bilaabay sheekadii oo yiri "beri baa geel naga hallaabay, markaasaan aniga iyo laba nin oo aanu isku bulsho ahayn baadiddoon tagnay intaanu geela raadkiisii qaadnay. Haddaba, gooraan saddex caanamaal baadigoob ku jirney, oo intaas soolka la yiraahdo Cambuulane iyo agagaarkiisa geelii ka goobeyno, ayaa wax gaajo iyo harraad la yiraahdo na heleen in kastoo aanu cambuulaysanaynay Galoolka. Maalintii dambe gooray naftii na hayso ayaa waxaanu kob ka hellay dhal yar oo biciid, halkaasaanu amminkiiba biraynay oo dabka saarnoo ku cunnay.

Haddaba goor ay tahay casarliiqii ayaanu xagga galbeed ka maqallay reen iyo gurdan xoog leh. In yar ka dibna waxaa na soo

galay waxaanu u malaynay libaax ordaaya. Araggii aanu aragnay oo isha la hellay waxa soo ordayaa inuu libaax yahay, ayaanu saddexdayadiiba geedkii aanu hoos fadhinay isku rarnay. Waxaa nasiibdarro ahayd in saddexdayadii nin, nin naga mid ahaa geedkii soo kori waayey, oo uu halkaas amiinkiiba annagoo u jeedna libaaxii ku qabsaday, in yar dabadeedna laf ma'ahee aanu cad ka reebin.

Waxaa naxdintii aanu ka naxnay ninkii noo weheliyey nagagana darnaaday waxyaalihii uu libaaxii habeenkii nagu sameeynaayey, ani iyo ninkii kale, waayo hadba intuu geedka kor ugu soo boodo ayuu gurxan iyo reer isku daraayey. Mararka qaarkoodna waxaad moodaysey inuu isku dayaayey inuu geedka rujiyo si aanu uga soo dhacno. Siduu habeenkii oo dhan noogu taagnaa ayaa waagii ku beryey, markaasuu naga tegey goortay ahayd qiyaastii barqo gaaban.

Aniga iyo ninkii aanu geedka ku wada joognay ee la oran jirey Mirre ayaa haddaba is waraysannay markuu naga tegey libaaxii, waxaana noo muuqatay inuu bahalku libaax lab ahayne, laakiinse ahayd baranbaarqo dhashay oo irmaan, taasoo aan ku rumeeyey markaan Mirre weydiiyey su'aashan oo ku iri "war Mirre maxaa baranbarqada ina ku ibtileeyey?" Wuxuu iigu jawaabay, Ilaahow nimaan wax ogayn ha cadaabin, war miyaadan ogayn ilmahaynu

shalay qalannay oo aynu dhasha biciid moodney inuu ahaa cagabaruur ay dhashay baranbarqadu." Waxaan ku iri side baad ku ogaatay, markaasuu iigu jawaabay "Warsamaw waxaan ku ogaaday waad xusuusantahayoo ilmihii anaa gawracay oo qalay haddaba markaan haragga ka bixinaayey ayaa waxaa ii muuqday inuu caga bahal leeyahay, waayo biciidku sida ugaarta kale laba ciddiyood buu leeyahay, kanise shan farood ayuu afarta addin ku lahaa, markaa arkayna waan iska qariyey bacdamaa aynu gaajoonayney. Waxaanna ogaaday maalintaas iyadoo aad iyo aad loogu fiirsado ma'ahee inaan la kala sooci karin dhasha biciidka iyo dhasha libaaxa markay aad u yaryar yihiin. Waxa kaliyoo inta badan lagu kala garan karaana ay yihiin addimada farahooda oo aan isku tiro ahayn.

Haddaba, markaan saas ogaaday baan waxaan xusuustay jeeniqaar cagabaruurkii ah, oo aan geedka degdeg ula soo koray nadxintii, halkaasaanu isagii kala goosannay, maalintii oo dhanna geedkii baanu sidii ugu joognay.

Goortay casar dheer ahayd, ayey sidii si le'eg gooshii iyadoo ay la socdaan laba aar soo ciyeen oo geedkii hoos yimaaddeen. Habeenkaas labaad waa habeenkay noogu darrayd oo libaaxyadii oo dhan ayaa xooggoodii isugu geeyey geedkii inay lulaan. Haddaba goortay ahayd habeenkii gelinkiisii dambe, ayaa

lulooyaa iyo baqayaa mooyee ninkii labaad geedkii ka dhacay oo ku dul dhacay libaaxyadii. Wuxuu la kulmayna waad malaynaysaa. Haddaan keligey raggii ka haray oo waagii saas iigu beryey maalintii labaadna geedkii dushiisii sidii u saarrahay oo aan naf iyo nolol ka quustay, waxa keliya aan filayeyna ay ahayd gabbalkoo ii dhaca oo libaaxyadiina sidoodii isaga yimaaddaan, Ayaan intaan bisinkii Ilaahay cuskaday Yaasiinka Qoraankana oo aan kor ka hayo akhristay il Ilaaahay iga badbaadiyo dhibaatadii i haysatay. Calimaaxaw waxaa la yiraahdaa, bisin Allan in bilaabay belaayo uma timaaddo.

Waxay kaloo Soomaalidu tiraahdaa, naftii Ilaahay bixinaayo ninna ma joojin karo tii aanu dilaynna libaax labadiisa daan ayuu ku badbaadiyaa. Haddaba, gooray hargalkii ahayd ayaa beelo hayaan ahi ku soo beegmeen geedkaan saarraa. Markii aan arkay awrtii geeddiga ahayd iyo xoolihii ayaan damcay inaan u qayliyo dadkii, hase ahaatee waan kari waayey inaan labada debnood kala furo. Iyadoo haddaba aan waxaan sameeyo garan waayey ayaa xagga Ilaahay gabar gashaantiya geedkii soo ag martay oo raqdii meesha tiillay dareen ka galay. Markaasaan intaan laan qallalan jebiyey ku tuuray oo madaxa kala helay. Markii qorigii gabartii madaxa kaga dhacay ayey tiri “hayaay tolow ma samadaa layga dilayaa.”

Markaasaan mar labaad ku tuuray mid kale oo uu horteeda ku dhacay, kolkaasay dareentay in geedka cidi ku joogto oo i soo eegtay, amminkiibana jalleeciddii u horaysey ayaa isheedi igu dhacday inaan geedka saarrahay. Halkaasay intay dadkii u qaylisay geedkii la iga dejiyey oo si fiican la ii dhuunyey. Muddo dabadeedna waxaan guursaday gabartii geedka iga heshay si aan ugu abaal gudo. Gabartii shalayto ku heshayna waa gabadheedii curad oo aan anigu aabbeheed ahay.

Haddaba, Calimaaxaw in kastoo ay dhibaato weyni ku heshay laba hal oo aniga ila kulmay kumay helin. Waayo taan u horraysa meeshaad sagaarada ka cuntay waxaan anigu ka cunay dhal libaax gaajo daraaddeed, oo weliba baranbarqadii dhashay igu soo dul joogsatay anoo wax ka dubanaaya. Tan labaadna in kastoo aad sheegtay inay bahaluhu hareeragaaga gurxamaayeen oy maydadkii kale ku cunaayeen agtaada, hase ahaatee weli maad arag libaax intuu labada jeeni kala rogay saaxiibadaa oo hortaada hadba intuu miciyaha daro cantuugo rudho, oo aad calaliskiisa iyo curduqda leqiddiisa sax iyo maan u maqlaysid."

Cali baa markaas hadalkii qaatoo yiri "horta Warfaayow waa runtaa oo anigu dhal libaax gaajo daraaddeed uma cunin, rag jaallayaashay ahna hortayda libaax kuma ruugin, laakiinse waxaan kuu sheegayaa inuu shabeelku ka belaysan yahay libaaxa, waayo

waxaa la yiri, shabeel baa beri libaax ku yiri, libaaxow bal ama boqon nin la xoog noqo, ama boqol nin la xirrib noqo. Markaasuu libaaxii wuxuu doortay inuu boqol nink la xoog noqdo, halkaasaa shabeelkiina la xirrib noqday boqol nin. Sidaas awgeed baan shabeelka meella loogga baxsan karin, oo geed haddaad fuushid waa kuugu soo korayaa, haddaad kal ama meel biya ah ka gashidna dabbaal buu kuugu imanaayaa. Markaas waxaa cad inuu shabeelku ka khatarsan yahay, oo ka khayaano badan yahay, oo ka xirrib dheer yahay libaaxa xoogga iyo lixaadka ku faana.

# WELWELKII IYO WALBAHAARKII CAWRALA

Waxaa welwel, walbahaar iyo walaac Cawrala geliyey heestii cirsan-ka-yeerka, khaas ahaan saddexdii tixood oo u dambeeyey heesta ee ahaa:

> Dayaxu ma gabdhin, manuu gabax oran,
> Ha yeeshee gashuu degey, way guduudnayd,
> Ee ha gacan gelin, jeer gu'soor da'o

Iyadoo ay u muuqatay Cawarala in tixaha heestani yihiin xaal ku shuqulle xiddigaha, ayey waxay u sheegtay geeladeed Saluugla inay la doonto qof xiddigiska aqoon dheer u leh oo fura tixahaas micnahooda. Hadday maalmo goobaayeen xiddigiye, ayaa maalintii dambe waxaa loo sheegay inuu jiro nin Darawiishta ka mid ah, oo aad uga baaraandegey xiddigaha iyo maluugada iyo cilmi curaafiska. Halkaasay Cawrali cid u dirtay ninkii loo tilmaamay oo gurigoodii ugu yeertay gooray fiid hore tahay. Waxse dhacday inay ka naxday filidda aanay filayn inuu xiddigiyuhu noqodo Darawiishkii Bile oo farriinta uga keenay Calimaax, markay Darawiishtu duulaan uga soo baxday Xarun. Isla mar ahaantii Cawrali dareen kama qabin inuu Bile yahay ninkii

habeenkii geerida Calimaax loogu soo warramay oo ay xeebta keligeed ka heesaysey, uga jawaabay heestay hadda doonayso in loo micneeyo, dabadeedna cirsan-ka-yeerka isugu sheegay intuu koray meeshay fadhidey meel ka korraysa oo dhagax dushiis ah.

Waxaa jirtey in Bile iyo Calimaax ay aad iyo aad rafiiq u ahaayeen, Bilena uu ahaa ninkii geerida Calimaax Cawrala u sheegay habeenkii hore, haddaba markuu warkii geerida u sheegay Cawrala habeenkaas, bile kama tegin Cawrala'e kor ayuu ka ilaalinaayey ilaa uu cirsan-ka-yeer isugu sheegay markuu uga jawaabay heestay ku calaacalaysey, isagoo isla mar ahaantii tusaalaynaaya mabaadiida Darawiishtu inay tahay inaan nin Darawiish ahi mar haddii jahaad dalkiisa ugu jiro oo uu gaalo la dagaalamaayo aan la oran karayn hadduu jahaadka ku dhinto waa geeriyoodey ee la oranaayo wuu janna tegey.
Cawrali intay shah u karisay Bile bay si fiican u dhoweysey, oo intaanay xaajaday ugu yeertay u furfuran sheeka dheer, iyo arar ka bixisay dhibaataday iyadiyo Calimaax soo wada wareen, markay doonnidu la degtey iyo siduu gacan ugu geystey oo baddii kaga soo bixiyey. Cawrali waxay aad ugu dheeraatay inaanu xaggeeda Calimaax ahayn nin la illaawi karo. Waxay kalo raacisay inay hadduu geeriyoodana si kastaba ha yeeshee ay dul tegayso qabrigiisa iyo halkuu ku naf baxay.

Cawrali waxay ku tiri Bile “Bilow horta anaa kuu soo cid diray waxaanna doonayaa inaan caawaa aad kuugu xog waramo dabadeedna aad ii furtaa heestaan kuu sheegi doono, waayo waxaa laygu yiri aad baad ugu fogtahay cilmiga xiddigaha iyo maluugadaba. Heestanaa habeen dhoweyto ayaa anoo cidla iska fadhiya oo heesaaya ruux aanan arkayn tixraacay heestaydii oo ku soo dujey heestiisii saddexdan weerood oo aan kuu sheegi doono. Haddaan waraystayna inuu kay isu sheego ruuxii wuxuu i yiri “waxaan ahay cirsan-ka-yeer”.

Bilaa hadalkii qaatay isagaan isu sheegin inuu isaga ahaa ruuxa heesta tiriyey ee cirsankayeerka isugu sheegay. Wuxuu yiri “waa runtaa Cawralaay oo aad baa la iigu xantaa cilmayadaad sheegtay, is faaninna maayee wax baan ka aqaan, Soomaaliduna waxay ku maahmaahdaa xiddiga sheeg cirka kaaga xeel dheer,
xaryan wadowna badda kaaga xeel dheer, markaas waxaan filayaa inaan xaajada kaa murugtay intaan oddoroso kaa dherginaayo, ee bal si fiican oo tifaftiran iigu sheeg heestaad sheegtay miraheeda.”
Halkaasay u sheegtay heestay ku heestay habeenkay badda ag tagtay iyo heestii cirsan-ka-yeerku ugu jawaabay. Wuxuu yiri Bile markay dhammaysay heesihii “waa tahay Cawralaay i maqal haddii arrintu intaa yahay wax dhib leh ma aha’e. heesta cirsanka-yeerku waxay tusaalaynaysaa haddaan sangaabta soo qabto, inanu

Calimaax geerina ahayn nololna ahayne ee uu gal dhiig ah dhex yaallo. Marka gu'soruhu da'ana war sugan baa laga helayaa. Haddaan sii faahfaahiyana waa dhaawac dhimasho looga tegey, waase dhiig fuqayaa. Wuxuu kaloo raaciyey intaas Daraawiishkii Bile inuu isku deyaayo inuu bal xagga iyo bari u waraysi iyo baadidoon tago, oo ay Iyana Cawrali intaas samir iyo iimaan sii yeelato." Cawrala waxay tusaalaysay inay intay samir yeelan karayso samrayso, laakiinse ay ka cabsi qabto in nin loo arooso, iyadoo aan weli Calimaax geeri iyo nolol midna ku hubsan.

Wuxuu ugu dambaystii ku yiri "waxaan Cawralaay kaala dardaarmayaa inaadan arooskaas yeelin wax kastoo dhaca, haddaad soo baxsan kartidna u soo baxso galbeed ama Nugaashaas fog oo aan cidihiinna xeebaha degaa soo gaarayn. Midda kale haddaad ciyoon war iga weydid markaan bari tago waxaan aadayaa xaggaas iyo Xaruntii Taleexe ogow."

Halkaasa Cawrala iyo Darawiish Bile lagu kala tegey, oo Cawrala laysku soo haray Saluugla. Cawrala markaas ku tiri "Saluuglaay waadigii Darawiishkii maqlaayey ilaaddiisiiye, waxayna Soomaalidu tiraahdaa, saaxiibka ama saanec kuu ahaa ama sabab kuu ahaa'e waxaad ka soo talisaa saddexda hal midaan falo, inaan kudaalo, oo u kaco xaggas iyo galbeed fog iyo dhul aan la gaagaynin, oo duurgal bahal dibadeed noqdo, iyo inaan ninka la

sheegaayo ood xaalkiisa ogtahay oori u noqdo, iyo inaan sidii kale oo ay ka fursanweydo yeelo?"

Markay Carwali hadalkii dhammaysay ayaa Saluugli ku tiri "waa tahay Cawralaay dhammaysay oo xil weyn baad i saartay, oo waxaad i tusaalaysay inaan haddaan saaxiibaddaa runa ahay tala habboon ku siinaayo haddaanan ahaynna ku habaabinayo, haddaba, waxaad i siisaa ila saaddambe si aan uga soo fekero, waayo waxaa la yiri, hadday degdegsiiyo door dhalaan, kaadsiiyana kiish lacagay dhalaan, markaas aan ka baraandegee taladaas iga sug."

Cawrali waxay sheegtay inaanay waxba ka qabin muddaday Saluugli qabsatay, in kastay ku adkaysay inay soo dhakhsato, sababtoo ahayd waxay cabsi ka qabtay inay waxyaala kale, oo lama filaan ah, oo aanay ka tabaabulshaysan ka soo hormaraan taladay codsatay.

Nasiibdarri, siday ka baqaysey, ayey la kulantay oo aroortiiba aabbeheed baa u yimid oo ku yiri "Cawralaay waa innagii is ogeyne sow wixii lagugu sheegaayey oo jacaylku sheegga ahaa kaama bixin intaan cidaha ka maqnaa. Midda kale waxaan filayaa inaad sidaan isku ogeyn aad diyaar u tahay in lagu arooso marka gugu da'o."

Wuxuu kaloo ku yiri "Ninkaan ku siiyey waad ogtahayoo waa nin maalqabeen ah oo marriin, masruuf, mood, madhax iyo wixii mulug adduunya ah buu ku mihiibsiinayaa. Waxaana ninkaas laguu siiyey xigsiisan ahaan markay gabartii kaa weyneyd ee walaashaa ahayd ka dhimatay." Wuxuu kaloo ku yiri "waa inaad shaydaanka iska naartaa oo ninkaas xoolaha aan sheegay kugu derejeynaaya guriguu seexan lahaa cawskiisii, kebdihiisi iyo wax alla wixii lagu xardhi lahaa sii abidaa."

Cawrali aabbeheed wuxuu kula hadlaayey oo dhan labada dibnood uma kala furin oo eray uma celin, waxse uurkeeda ku soo dhacay markuu ninka maalkiisa, moodkiisa iyo maal adduunyahuu qabo ka sheekaynaayey inay waxyaalahaasi yihiin waxyaalihii geeladeed Saluugla aabbeheed sababay oo hunguriga ka soo ridey kuna kallifay inuu inantiisa siiyo oday geed labadible ugu xirta oo if iyo aakhiraba seejiyey.

Waxay kaloo xan ku maqashay inuu ninku yahay nin qorqode iyo xilagube ah, oo geeridii walaasheed wax laga saaraayey, inay u dhimatay nabaro uu hangool ku gaarsiiyey maalin uu dilay.

Ugu dambaystii, in kastaanay codkeedii kor u qaadin oo aabeheed maqashiin, waxay iskula faqday oo uurka iyo maanka oo wada jira ka tiri "Allahayow qaraaraa nimaad qaweddey guurkiisu,

Allahayow qaraaraa quud aadan cunidiis dooneynin, Allahayow qaraaraa nimaan qalbigu raacaynin, Allahayow qiyaamaha ka daran qarqode guurkiisu, Qaadirow Ilaahow qisaasteer iga badbaadi." Goortay ereyadaas cabbaar uurka kaga maansabolidaay oo aabeheedna weli doc fadhiyo ayey ku tiri "abbe waadigii intaad adigu i oran lahayd yiree, bal afaraydan iga dhegayso."

Maalqabeenka geeliisa ramag, madar ku maalaaya,
Oo muluggii adduunyada qaboo, midigta loo saaray,
Nin micnaha magaalada yaqaan, yey maskabi dhaamaa, Magalooti jaahila, oo haddana madax taagaaya,
Oo haddii muran idin dhex maro, meel ku jebinayaana,
Ninki birimagaydada yaqaan, yey maskabi dhaama,

Maangaab aan aqoon iyo lahayn, madadka haasaawe,
Oo mugdi habeen gudahayoo, marin habaabaaya,
Oo aan maraaciga haween iyo muxibadood haynin,

Oo aan miligiyo maansa gabay, mira ka sheegaynin,
Oo sida Maax waa maahire, mayey u horaynin,
Inaan meel cidla ah weytamaa, yey maskabi dhaanta,

Muudal weeye iyo nimaan, muqdarba ahayne,
Oo magligiyo hangoolayntu, waa meheraddiisiiye,
Waa wixii makalay weeladay, milaygii dayreede,

Murwana daryeelkeedu, waa xil iyo maamuuse,
Mar hadduu manfacii hunguri, mee ii oranaayo,
Inaan meerto guumays noqdaa, yey maskabi dhaanta, Malabkiyo macaankiyo wixii, mid iyo maaheera,
Maantaas haddii lay wacoo, la i mihiibsiiyo,
Maalaydaa dacartoon rabaa, yey maskabi dhaanta,

Aabbow maqaan iyo waxaad moogtahaa badane,
Oo intaasoo masalooyinaan, maragsanaayaaye,
Haygu meherin aabbow, nimaanan muxibbadiis haynin,
Haygu meherin aabbow, nimaanan muxibbadiis haynin,
Haygu meherin aabbow, nimaanan muxibbadiis haynin,
Bacdamaa Cawrali u dhalatay waxgarada aqoon leh cilmigana ay heer fiican ka gaartay, waxay damacday inay aabbeheed oo aan garasho iyo aqoonba la gudboonayn, gabaygaas ku fahamsiiso inay

qiime iyo ahamiyad siinayso ninka raganimadiisa, wax garadnimadiisa, aqoontiisa ku saabsan dhaqanka guurka iyo daryeelidda ka dhexaysa ninka iyo murwada u dhaxda.

Laakiinse, aanu maalku fara kasta ha lahaadee waxba ku fadhiyin haddii rukunnadaas guurka salka u ahi ay kala dhantaalan yihiin. Isla markaasna waxay si tafaftiran u tusaalaysay inaan guurka milgihiisu daduuc iyo afduub ku habboonayn ee uu ahaado kalgacal, iyo jacayl ka dhex dhasha labada ruux.

Ayaandarrise, aabbeheed ma fahmin ula jeeddadii gabayga Cawrala, markaasuu intuu gambarkuu ku fadhiyey kor uga boodey oo kor u dhawaaqay oo yiri "wegerey! Ma taasaad keetay? Oo waxaan ku waaninaayey waad ka sii dartoo dibi dhashay? War Dalmarow iyo hooyadeedey bal kaalayoo dhegaysta waxa gabartan waalatay Ilaahay afkeeda ka keenay."

Qayladii uu odaygu qayliyey ayaa waxaa u yimid hooyadeed iyo walaalkeed Dalmar, iyo dad kale oo cidhii deriskooda ka mid ahaa. Haddaba, intii odaygii iyo hooyadeed iyo dadkii kale isku buuqayeen ayey Cawrali ka dustey aqalkii iyadaan la ogeyn, hase yeeshee in yar dabadeed yaa la tebey inay maqan tahay, markaas walaalkeed lagu yiri doon hadday ku diiddana keen iyadoo labadible u xiran. Sidii la faray Dalmar amminkiiba Cawrala waa soo helay wuxuu gurigii ku soo celiyey iyadoo labadible u xiran.

Halkaasaa inta tiir aqalka dhexdiisa ah la qabadsiiyey labadible loogu xiray iyadoo ilmadu ka tililikh leedahay, hooyadeedna ku halaahalayso “tanu quus weeye oo belaa la tagtay ee ha la furdaamiyo hana loo kitaab furo intay goorigoor tahay.”

Kolkay hadhgalkii ahayd ayaa ciddii oo dhami isugu timid gurigii, oo hadhimadii halkaas lagu cunay. Waxaa ka mid ahaa dadka ka soo qayb galay hadhimadii Cawrala adeerkeed, oo Cawrala aabbeheed u cid diray si uu ugala tashado bal wixii Cawrala laga yeeli lahaa. Adeerkeed wuxuu ahaa nin abwaan iyo waaya arag ah, aminkiibana markii soortii la soo dhigay ayuu Cawrala xarigii ka furay oo ku yiri “adeer Cawralaay i maqaloo agtayda soo fariiso soortan wax ka cun, waayo baahi inaad qabtaa indhahaaga iiga muuqata.”

In kastoo adeerkeed si wacan oo raxmad leh u soo dhoweeyey iskuna deyey inuu soortii cunsiiyo, Cawrali laba iyo saddex jeer keliya oo dadduuc ah ayey gacanta gelisey xeeradii Mooliga ahayd ee soortu ku jirtey.

Haddi hadhimadii la dhamaystay, ayaa Cawrala iyo adeerkeed laysaga tegey, oo loo faq daayey si uu uga baaraandego gabarta lagu yiri quus baa laga joogaa. Wuxuuna hadalkiisii ka bilaabay isagoo aad u araranaaya oo beerlaxawsanaaya Cawrala

“Cawralaay adeer ugu horraystii waxaa filayaa inaan caad kaa iga saarrayn inaan ahay adeerka aabbahaa la dhashay oo naas la nuugey, maalintaad dhalatayna anaa ku soo baalleeyey, Cawralana kuu baxshay, markii kaa la iigu bushaareeyey.

Midda kale waxaan ku xusuusinayaa inaan anigu sabab u ahaa cilmiga iyo aqoontaad soo baratay markaan aabbaa kula taliyey inuu dugsi Cadan kaaga daro. Intaas waxaa ii raaca, waxaan maqlay inaad diidday ninkii xoolaha badnaa ee xigsiisanka laguu siiyey, taasina mid lagaa filaayey ma’aha, waayo dantaada iyo tan reerkiinna midna ma’aha.

Aniga qudhayda wuxuu iigu ballan qaaday, haddaad oggolaatid ninka lagu siiyey inuu i siiyo sidig geela. Haddaba maandheey ciroole guudka ka caddaaday baan ahee ha igu gacan sayrin, oo waxaadna ogaataa in la yiri saddex baa adduunyada laga waraystaa waxna laga weydiiyaa. Saddexdaas oo ah, uurku ciroole, adin ku ciroole iyo oogo ku ciroole, aniguna saddexdaas baan isugu jiraa ee yaanay waanadaydani kula fududaan oo inkaari aniga iyo labadaada waalid kaaga nagaga dhicin. Tan ugu dambaysa miyaadan maqal gabaygan waanada ah:

Ma ogtahay ikhyaarkii ku raba, inaan la iska eedaynin,
Ma ogtahay abaalkiisu, waa inaad addeecdaaye,
Ma ogtahay ninkii uumiyaha, la ibtilaynaayo,

Ma ogtahay wixii khayr leh, baa lagu adkeeyaaye,
Ma ogtahay adduun nimaan lahayn, laga ilwaad roone,
Ma ogtahay dadkuba haatan, waw iima tiriyaaye, Ma
ogtahay inkaar waalid, waa eebo kugu taale, Ma
ogtahay ishiisaa ka daran, ololkii naareede.

Maandhey hadal wuxuu qaaya lahaa waanana lahaa kuu dhammeeyey, ee inaan Alla ku qaadin arrinkaas ha nagu diidin."

Cawralaa markaas hadalkii qaadatoo tiri, "adeer waad ku mahadsan tahay waanadaad ii soo jeedisey, waxaanna ogsoonahay inaad wanaag ma'aha'e xumaan ila jeclayn. Waxaan kaloo leeyahay intaad gabayga ku sheegtay oo dhan waxba ka jira, laakiinse tixdii ugu qiima roonayd oo ahayd, ma ogtahay aqoon nimaan lahayn waa Allaw sahale, ma ogtahay markaad eray tiraahduu kugu ilaaqaaye." Baa laga yaabaa inaad ula kac carrabka ugu dhifan, iyadoo suura gasha inay kaa tahay inaad qiimaynaysid waxyaalaha kale oo tixaha aad sheegtay ku jira, laakiinse aadan daryeelayn ahamiyadna siinayn aqoonta dadka u ah ifkii iyo ilayskii inta ifka iyo adduunyadan lagu nool yahay. Si kastaba ha kaa ahaatee hadalkaad i tiri waan ka soo fiirsanayaa go'aan buuxana wixii aan ka yeeli lahaa saaddambe iigu kaalay.

Halkaasaa Cawrala inta adeerkeed nabadgeliyeeyey ku yiri "Cawralaay waad mahadsan tahay arrinkaasna aan kuugu imaaddo adoo niyadsan oo aanu ku noqosho iyo wax iska weydiin dambe lahayn."

Cawrala iyo adeerkeed saasay ku kala tegeen, isagoo, isagu aad u faraxsan, Iyana ay aad uga murugaysan tahay ballan qaadka ay ballaanba qaadday inay ka soo fiirsanayso waxay ka yeelayso arrinkuu ula yimid.

Aroortii bay Saluugli u timid iyadoo taladay Cawrali weydiisatay ula socota. Haddii in yar lays nabdaystay ayey Saluugli

"Cawralay anoo kula jeclaa inaad heshid ninkaad jeclaatay misna haddaan fekeray oo xag walba ka eegay waxa ila noqotay inaadan dhaafin wixii waalidkaa rabo, waayo waxa la yiri "haddii aad weydo waxaad doonaysid wixii dani ku baddaa la yeelaa." Tu kalena waxaa iyana la yiraahdaa, hawadaaduna been bay kuu sheegtaa hantidaaduna runtay kuu sheegtaa markaas, sidaas darteed haddan xag walba ka rogay arrinkaas wuxuu iila ekaaday inaad been haweysatay oo nin aynaan ogayn runtii inuu nool yahay iyo in kale baad noloshaadii oo dhan ku xirtay. Intaas waxaa ii raaca oo aan so ogaaday inuu Calimaax gabar aroostay amminkiiba markuu halka ina kaga tegey oo Xarun galay, markaas maxaa kaaga maskab ah ninka aynaan ogayn inuu horta nool yahay, hadduu noolaadana

rugtii arooskiisii cusbaa iyo minweyntiisii aan hurayn. Midda kale waxay tahay, haddii Eebbahayba kiin isu calfo miyaad naag kale oo eynigaaga ah dangalo u noqon karaysaa? Aniga taasi wey ila qaraar tahay oo wax murwo uga derjo liita marjirto, markay dadab naagi uga horraysey ka daba gasho. Tan u darri oo aan soo xansaday waxay

tahay in warqaddaad u dirtay foolxumo ka raacday markuu akhrisan waayey oo uu dhiibay soddogiis iyo seeddigiis oo halkaas xaal gola jooga ah lagaga qaatay wixii aad warqadda ugu qortay. Haddaba ma ninka hadalkaagii macaanaa oo qiimaha lahaa xaalka ka bixiyey baad wax ka sugaysaa? Waxaa Cawralaay la yiri, ruuxii aan quus aqoon, isagaa quus ah, Cawralaay in kastoo aan aabbe iyo hooyo ina wada dhalin misana waxaad ii tahay walaashay dhaba ah, markaas sidaas darteed taladaydan ha fududaysan, waayo waxaan kaala baxsanayaa inaad reerkiinna ka dayrsantid oo aad nolol xun ku waartid."

Cawrali hadaladaas iyo talooyinkaas aanay ka filayn Saluugla aad iyo aad bay u damqeen, oo welwel iyo walaac u geliyeen. Laakiinse in kastoo ay ka dhadhamisay in hadalada qaarkood run ahaayeen, misana waxay ku adkaysatay oo goosatay, iyadoo adduun irrid walba kaga soo oodmay inaanay guurkiisa oggolaan ninkaas Geelle la yiraahdo. Waxay kaloo goosatay inay adeerkeedii ka sugaayey jawaabta sidaa ugu sheegto, inay go'aan ku gaartay inaanay oori u

noqonayn Geelle nin kaleba ha joogee. Markay saas goosatay ayey Saluugla ku tiri “saan kaa filaayey ma yeelin oo tala nacab baad ii soo jeedisay, laakiinse aduun baa dad oo dhan iigu sokeeyee ha iga ag fogaan.”

Saluugli waxay ka ballan qaaday inaanay ka fogaanayn, halkaasaana lagu kala tegey goorey tahay casar gaaban. Sidii ballanku ahaa arootii dambe, gooray tahay xigsiintii, ayaa adeerkeed u yimid iyadoo keligeed ardaaga fadhiga oo gacanteed midig murdisadeeda dhulka ku xardheysa. Ugu horreystiiba marku adeerkeed bariidiyey wuxuu ku yiri “maxaad Cawralaay gegida u fadhaysaa ma hawl kalaad weydey, mise arrinkaan isla ogeyn ayaadan weli go’aan ka gaarin?”

Waxay ugu jawaabtay adeerkeed afareydan, iyadoo tusaalaynaysa inay weli diiddan tahay in loo dhiso ninkay diidaysay, waxay tiri:

Haddaan lay garaabayn, haddaan idin garwaaqsiyo
Oo aan Layla garanayn waxier, gama’a ii diidey
Gartay weeye Naallow inaan, gegida jeexayey

Guurkii diidey nimaanan rabin, gogol wadaaggiisa Guursi
diidey Geelliyo nimaanan, gacalnimey hayne Oo go’aankii
ku siiyey, adaa gebegebayn doona.

Adeerow godkaad ila rabtaan, gudcur madow weeye
Guuldarrooyin hay badin iyo geesaas haweenaadka
Oo garba duubka iga daa ayaanan, uruga geeriyoone.

Markay tixahaas dhammaysey ayaa adeerkeed ku yiri, “maandhey maxaad hadalkaas u tiri, midda kale waxaan ku leeyahay, in kastoo ay tixahaagaasi meel i damqeen, misna waxay lagama maarmaan noqon weydey inaan laguu jixinjixin, oo dhakhso arooskaagii loo dhammeeyo.”

Siduu ku ballan qaaday Cawrala adeerkeed, amminkiiba aabbeheed iyo hooyadeed buu hadalkeedii u sheegay, wuxuuna ku dhiiri geliyey labadeedii waalid inaan dheg loo dhigin hadalkeedaase jujuub iyo garbaduub si degdeg ah lagu aqal geliyo.

# AROOSKII CAWRALA LOO AROOSAY GEELLE

Markii lagu heshiiyey wixii ka dhacayaa ha ka dhaceene, in Cawrala garbaduub loogu dhiso Geelle Geelbadane, ayaa isla mar ahaantiiba waxaa degdeg loo bilaabay qabanqaabintii arooska, iyadiina waxaa loo qaybshey oo la dul dhigay dad ilaaliya si aanay u baxsan.

Waxaa kaloo dhacday in ninkii Geelle oo aan magaalada joogin loo cid diray inuu muddo yar ugu soo tabaabulshaysto arooskii Cawrala, oo uu muddo dheer sugaayey, marna ayba dhacday inuu ka quustay, oo ka samray guurkeeda.

Afar caanamaal kaddib, ayaa Geelle soo galay magaaladii Xiisxarrago, isagoo hangool ku garba rogan, oo boqol geela iyo baarqabkoodii yarad u wada. Geelana waxaa ku jirtay sidigtii uu ugu ballan qaaday Cawrala adeerkeed.

Intii arooskii la qabanqaabinayey Cawrala aad bay uga murugaysneyd garbaduubkaas loo garbaduubay Geelle, isla markaas jacaylkii hayey sidii iyo si ka daran ayuu ugu kordhay.

Haddaba markay u caddaatay inaanay innaba sina uga fikan karayn xaalkaas, ayey midab doorsoontay oo waxay qurux iyo dhalaal u dhalatay maaley iyo catir u ekaatay.

Waxaa dhacday haddaba, habeenkii la meherin doono habeenkii ka horreeyey, ayey Cawrali ku riyootay oo manaan lagu tusay, iyadoo Calimaax aroos ugu ah meesha la yiraahdo Mashacaleed, oo dhalinyaro iyo waayeelba loo dabbaaldegayo, cayaarta shirbaha la yiraahdo oo barigaas caanka ku ahna loo cayaaraayo.
Mashacaleed waxay ku taallaa jarcaleedka hoostiisa oo ah meel ku dhow Gurifaras oo ah meeshii Calimaax lagu dhaawacay, markuu duullaankii Darawiishta ku jiray, waana meel il biya qabow ka soo baxayaan leh, oo darayo harac macaani oo da’ weyni ku yaalliin.

Cawrala arooskaas buuxa oo ay riyada ku aragtay, looguna dabbaal degey, oo waxay Calimaax jacayl iyo kalgacal u qabtey oo dhan la mahiibsiiyey, karkiisiina ka dhacay, waxaa ugu war dambeysey markay soo baraarugtay oo haahaabatey hareereheeda mise waa waxba kama jiraan iyo meel cidla ah. Cawrali habeenkii intii ka hartay laba indhood isuma keenin, oo siday u soo jeeday ayaa waagii ugu galalac yiri. Cawrali intii ay ilgalaclaynaysey oo soo jeeddey habeenkaas dhawr jeer bay ku soo dhacday inay fikato

oo guura gasho ilaa bari guntiis, misna way walwalaacday oo la ahaan weydey inay saas yeesho.

Aroortii gooray tahay xigsintii, ayey Saluugloo u soo wareegtey ku tiri "Saluuglaay, haddaan kuu sheego arooskaan xalay riyada ku galay oo lagu dabbaaldegey waxaad oran doontaa waa waxaagii oo iga rumaysanmaysid." Markaasaa Saluugli ku tiri "anigu waaba yaabbanahay sidaad u xusuusan doontid riyadii xalay, waayo riyada amminkiiba waa la illaawaa, balse wax iiga
sheeg ku oran maayo waa waxaagiiye." Cawralaa markaa hadalkii ku noqotoo tiri "Saluuglaay tani midaan ilaabi karaayo ma ahee, bal dhegeyso tixdaydan gaaban oo magaceedu yahay, muxibbada riyada uun ahay muhashadeedayba, oo aan ku tusaalaynaayo waxaan la kulmay iyo waxaan ku arkay oo dhan, waxay tiri:

Matakhayey marsada Laasqoraan, muujey daaraha'e,
Oo miridhaan ku maray Maydh, iyo marinkii dheeraaye,
Dabadeed Mashacaleed u kacay, madanti weynayde,

Muslin haddii aynu nahay, magaydu waa ceebe,
Muftigiyo mashaayiikhda diin, mariye qiilkiiye,
Oo masalooyin waajiba halkaas, Cali maqbuuleeye,
Oo min aroosa lay geli, anoo lay mashxaradaayo,

Murwo iyo wixii madad lahaa, lay marxabadeeye,
I maaweeshe dhallintii shirbaha, muraansey qaadeysey,
Oo wiilkii Muraysiga ahaa, midigta lay saarye,
Oo Masar xariir iyo milmilah, i maraanmariye,
Mahad Eebbe weeye hurdadii, dhab u macaantey,
Oo maaxaan u jiidh go'ay jannada, miraha yaad quudnay,
Majarogadka mawijada gabliyo, maayadaha raacay,
Marmarna daruuraha cirkiyo, samada meehaabay,

Anigoo wixii iga maqnaa, la i mahiibsiiyey,
Oo maansha Allaahiye fadhiya, meelaan garanaayo,
Oo mafsuuday raaxada adduun, miridho weeyaane,

Ku mir kacay anoo meel cidla'a miyir la'aan jiifa,
Oo muusareenka iyo deedda dhici, maansha dhaxamaysan,
Muxibbada riyada uun ahay, muhashadeeday ba,

Malahayn manaamkii xalay baa, malihii beenaane,
Malahayn mayeygii da'ay baad, oon ku maalliyey,
Muxibbada riyada uun ahay, muhashadeeday ba,

Milay guurka xiddigaan tirsaday, ururkii ii muuqday,
Malahayn mareeg baad u geli, micile aarow'e,
Muxibbada riyada uun ahay, muhashadeeday ba,
Wixii aan mardaaddiyo ladnaan, miyir dekeynaayey,
Malahayn malabkaad heshaa, maaleey u doorsoomi, Muxibbada riyada uun ahay, muhashadeeday ba,

Waa mugaal jacayl laga arkaa muraayad kuu dhowe,
Waa mangaade dhalanteed sidiisoo, lagu minhaadaaye,
Muxibbada riyada uun ahay, muhashadeeday ba,

Waa macaan iyo qaraar haddana, meel ku wada yaalle
Waa wax maahi kaa dhiga, markii lagugu maageero,
Ninkuu miray ayaa male yaqaane, mur iyo deebaaq dheh,
Markay Cawrali dhammaysay gabaygaas ayaa Saluugli ku tiri "Cawralaay waa riyo la yaab leh riyadaad ku riyootay xalay, laakiinse waxaa ku xusuusinayaa ama riyood ama ha riyoon caawa waa lagu aroosayaaye ogow." Halkaasay Cawrali ku quusatay markay haba yaraatee calaacalna ka weydey Saluugla oo ay dad oo dhan isugu kalsooni dhowaayeen.

Siday Saluugli Cawrala ugu dardaarwerisey inta maalintii oo dhan arooskii la qabanqaabiyey, iyadoo Cawrala hadhimadii la siiyey luqmadi ka degi weydey, ayaa goortii gabbalkii dhacay la aqal geliyey iyadoo cagaha jiidaysa oo in kastoo duunkeedu joogay aan naf iyo nolol toonina ku jirin oo hammi iyo qammi la madoobaatey.
Waxaa kaloo jirtey in xummad iyo darbad xoogle lagu qabtay maalintaas ay aroos gelaysey, hase ahaatee aan looga jixinjixin ee lagu guri geeyey iyadoo si daran u darbadaysan.

In kastoo Cawrala arooskeedii loo dabbaal degey oo cayaaro, iyo wacdaro xoog leh loo sameeyey si loogu raalli geliyo, misana waxaa nasiibdarri ahayd waxaan murugo iyo urug ahayni ugama kordhin, jirradii ay la aqal gashayna waa ku sii korodhay ilaa ay ugu dambaystii ku kalliftay ninkii loo aroosay inuu isaga celiyo reerkoodii markay baanashadeedii iyo xannaanaynteedii dhibaatooyin ku noqdeen.

Markay sidaasi dhacday oo Cawrala loo celiyey cidaheedii iyadoo weli sidii u jirran, ayaa ahaladeed wixii wax garad ahaa is tuseen in Cawrala nolosheedu halis ku jirto haddaan wax laga qaban. Sidaas aawadeed baa markaas Cawrala laga furay isagaan weli hanan ninkii lagu khasbay oo aanay jeclaan, kalgacal, niyad, iyo nafsadtoonna u hayn in loo arooso oo ay oori u noqoto. Waxaana

loogu ballan qaaday in meesheedii laga siin doono gabar Cawrala ka yarayd oo walaasheed ahayd.

Geelle waxaa ku khasbay inuu si hawl yar Cawrala ku sii daayo oo ay madax bannaanaato kaddib markay bukaan iyo jirro ka bixi weydey, werwerkuu ka qabay dhegxumadii hore uga raacday walaasheedii ka weynayd oo wax laga saaraayey inuu isagu sababay oo ay u geeriyootay nabar uu ku dhiftay doogtiisii, oo ay markaas dheg xumo labaad iyo geeri ku noqonayso hadday Cawralina ku geeriyooto iyadoo weli gurigiisa joogta.

Markaas sidaas aawadeed ayuu u yeelay inuu iska sii daayo Cawrala, halkeediina laga siiyo gabar kaloo ka yarayd.

# GEERIDII CAWRALA IYO BAROORDIIQII IYO U DUCAYNTII CALIMAAX

Markii Calimaax dhiigkafuqay oo uu ku bogsaday gurigii Warsame Warfaa uuna damacsan yahay inuu aado Cawrala iyo magaalada Xiis oo ay deganayd, ayaa nasiibdarri loogu soo warramay in Cawrala la aroostay muddo yar horteed. Aad iyo aad buu Calimaax warkaas uga murugoodey oo uu fallaar ugu noqday. Wuxuuna goostay inuu is illaawsiiyo oo iskaga samro Cawrala mar haddii la guursadey oo ay soddohowday.

Waxaa jirta oo caadooyinka iyo dhaqanka Soomaaliyeed oo qotada dheer ka mid ah, in mar haddii gabar la guursado, oo ay soddohowdo inaan ninna xumaan iyo samaan soo hadal qaadi karin, haddiise innaba nin ku kaco oo uu gabar la guursaday yiraahdo waa jeclahay, ama waa jeclaa, waxaa la saaraa xaal.

Haddaba, Calimaax isagoo Cawrala jecaylkeedii aad ugu dheer yahay, ayuu isagoo daryeelaaya dhaqanka iyo caadooyinka Soomaaliyeed iskaga samray Cawrala oo iska dhaafay soo hadal qaadkeedii, si aan berry ka maalin loogu ceebayn ruux murwa ah, oo la qabo hadan haynteeda.

Iyadoo ay haddaba, sidaas tahay oo uusan Calimaax weli Xarun iyo Taleex iyo reerkiisii dib ugu noqon ayaa goor aroorya ah nin xaggaas Xiis iyo Maydh ka yimid ugu warramay in Cawrali sakaraad noqotay mar alla markay guri gashay, dabadeedna ninkii aroostay laga furay oo ay madax bannaan tahay. Markuu Calimaax saas maqlay ayuu farriin ah in Cawrala la siiyo u diray cidaheedii, waana loo soo oggolaaday inuu guursado in kastoo ay weli jirranayd.

Haddaba waxaa nasiibdarri ahayd in Cawrali ka soo toosi weydey nabarkii lagu dhiftay maalintay aroos gashay, oo siday sidii bukaan ugu ahayd ku geeriyootey magaalada Xiis maalin maalmaha ka mid ah iyadoo aanay weli Calimaax hanan, in kastoo lala socodsiiyey in loo oggolaaday inay ooridiisa noqoto. Waxaana hadal ugu dambeeyey intaanay naftu dhaafin tixdan gabayga ah oo ay u sheegtay geeladeed Saluugla oo dhanta ku haysey. Waxay tiri:

Naftu waa macaan tahay intay, mala awaalayso,
Wa maqaama weyn tahay intay, maasha talinayso,
Ha yeeshee, masuubada heshaa, magaceed waw hooge,

Jacayl waa macaan yahay intaad hayso midhihiise,
Waa muusiiqa raaxa leh intaad, milaygii dhawraysid,

Ha yeeshee, haddii uu ku miro, mililkii waa hooge,
Cali way macaanaa markuu, midigta ii laadshey,
Waa mahadshay araggiisi hore, mayey la moodkiiye,
Ha yeeshee, markaan muuqii gabay, maqalkii wey hooge,

Mar haddaan waxaan mohanayiyo, mudanihii waayey,
Micne maleh adduuyadu haddaanan, maahad ku waarayne,
Mootkoo i dilaa ka roon, miiska aan ahaye,

Waxaa haddaba dhacday, in Calimaax loo sheegay geeridii Cawrala goor fiid hore ah, isagoo ceelka la yiraahdo Badhan oo ay weli Daraawiishi degganayd jooga, warkaasi Calimaax wuxuu ku noqday fallaar oo kale oo muddo saacada ah, ayuu aamusnaa oo eray qudhi ka soo bixi waayey urugo daraadeed.

Habeenkaas Calimaax wuxuu u ahaa habeen baas oo uu tiiraanyo iyo telel la ledi waayey, oo waagiina ugu beryey isagoo sidii u soo jeeda. Markii waagii beryey oo ay weli barqo gaaban tahay ayuu fardihii ka soo dhex qabsaday faras xamar ah oo jilba madow. Waxaa dhacday haddaba, in niman jaallayaashiis ahaa ay weydiiyeen meeshuu faraska u heensaystay, halkaasoo uu u sheegay inuu aadaayo naxariistii jaana alla sidii qabrigeedii oo uu

u soo ducaynaayo una soo qoraannaqaayo mar hadday jacaylkiisa dartiis Cawrali u geeriyootay oo u god gashay.

Markuu saas u sheegay jaallayaashiis ayaa afar iyagii ka mid ahi yiraahdeen “waa ku raacaynaa Caliyow oo kuu wehelyeelaynaa ilaa meeshaad ku simeysid oo gacaladaa taal.” Halkaasaa Calimaax oo ku jeeni qaaran haraggii shabeelkii uu dilay iyo afartii nin oo kale fardihii loo koray. Isagaana ugu horraystii faraskii uu ku joogey nadagii ugu hor dhiftay oo booddadii faraskii boodeyba geeraarkan ku qaaday. Wuxuu yiri:

Warka xeeb laga keenay, waa xabiibtay go’dee
Xamarow xakama diidow, xanfar duulay la moodyow,
Xawaaree orodkaagoo, Ximan jeefag ku dhaafoo,
Waan xawaal dhigayaaye, caawa Xiisa i gee,

Warka xeel laga keenay, waa xabiibtay go’dee,
Xamarow xakama diidow, xanfar duulay la moodyow,
Xawaaree orodkaagoo, Ximan jeefag ku dhaafoo,
Xaq laygu lahaa, iyo xus baan dhigayaaye,
Waan xawaal dhigayaaye, caawa Xiisa i gee,

Warka xeeb laga keenay, waa xabiibtay go’dee,

Xamarow xakama diidow, xanfar duulay la moodyow,
Xawaaree orodkaagoo, Ximan jeefag ku dhaafoo,
Qalbigay xanafoonoo, xummad bey derdertee,
Waan xawaal dhigayaaye, caawa Xiisa i gee,

Warka xeeb laga keenay, waa xabiibtay go'dee,
Xamarow xakama diidow, xanfar duulay la moodyow,
Xawaaree orodkaagoo, Ximan jeefag ku dhaafoo,
Xabadkaa i dakaamoo, waan xabeebsanahee,
Waan xawaal dhigayaaye, caawa Xiisa i gee,

In kastoo la xiddeeyo, aroos loo xaradheeyey,
In kastoo xoola badnaa, iyo xiriir loogu hagoogey,
Xirribtii indhahaygiyo, xubnahaygay ahayde,
War xiskii i dhinnaayo, Xadeed weyn ku habaabee,
Xamarow xakama diidow, xanfar duulay la moodyow,
Xawaaree orodkaagoo, Ximan jeefag ku dhaafoo,
Waan xawaal dhigayaaye, caawa Xiisa  i gee,
Waan xawaal dhigayaaye, caawa Xiisa i gee,
Waan xawaal dhigayaaye, caawa Xiisa i gee,

Halkaasay Calimaax iyo afartii nin oo u weheliyeelaysey oo fardihii ku wada joogay ka dhexeen hal habeen meeshay ka tageen oo ahayd meesha la yiraahdo Badhan ilaa Xiis.

Waxay Calimaax iyo jaallayaashii la socdey galeen magaaladii Xiis, gooray tahay maalin Khamiiseed makhribkeed. Mar alla markii la ogaadey nimanka magaalada soo galay oo fardaha watay in Calimaax ku jiro, ayey Saluugli amminkiiba u tagtay Calimaax oo ugu warrantay siday Cawrali u jeclayd una sheegtay heesahay iyo gabayaday u tirisay oo dhan, isla markaas waxay u sheegtay sidii laysugu tegey Cawrala oo nin loogu guuriyey aanay raalli ka ahayn, dabadeedna isagoo aan ninkii lo dhisay weli hanan, ay jacaylkaaga iyo kalgacaylkaaga Calimaax u geeriyootey.
Halkaasaa Calimaax habeenkii diyaariyey wanan iyo geel uu ugu Quraan naqo iyo wadaaddo u duceeya oo Quraanka tirsigiisoo dhan ku dejiya aroortii. Habeenkaas Calimaax waxay u ahayd habeen baas oo laba indhood haba yaraatee isuma keenin ilaa waagii ugu beryey siduu u soo jeedey.

Aroortii oo Jimca ahayd ayuu markaas ugu Quraan naqay laba tuldood iyo wanan badan. Saladdii Jimcena waxaa lagu dul tukadey qabrigeedii. Hadaba, markii salaaddii la tukedey oo la salaamadaysanaayo, ayuu Calimaax ka dhex kacay raggii oo intuu qabrigeedii xagga madaxa ka fariistay gacantiisa bidix ka soo furay

qardhaastii ugu xirnayd. Qardhaastaasoo ahayd xaashideedii jacaylka oo ay ugu diray Cawrali markuu Taleex joogey dabadeedna uu murtidii ku qorrayd macaankeedii u quuri waayey inuu tuuro dabadeedna uu sidii qardhaaseed u dahaartay oo gacanta bidix ku xirtay.

Halkaasuu intuu warqaaddii sida qardhaasta u duuduubnayd kala bixiyey, qalinna la soo baxay oo dhinaceedii kale kaga qoray jawaabtuu Cawrala xaashideedii uga jawaabayey. Wuxuuna ku qoray laba gabay oo uu midna ugu baroordiiqaayey midna ugu ducaynaayey. Wuxuu yiri:

Cawralaay gacalo,
Cawralaay johorod baad ahayd, jamatay laabtaydu,
Waxaad ahayd jannadaan rabo, jawda uu lahaaye,
Hayeeshee, jacayl waxaa ka adag, calafka jaangoyne, Cawralaay, naxariistii janna Alla siiyey, hoygii jannada Alla geeyey. Ilaahay raxmaddiisa ugu roonaayey, waxaad iga guddoontaa anoo uurka iyo laabta kaaga ooyaaya salaan kalgacal oo kasha iyo laabta ka soo go'day.

Midda kale waxaan kaa baryayaa oo kaa codsanayaa inaad i saamaxdaa oo haddaan naftaada [sababay…] raalli ahaataa, waayo

maalintaan badda kaa [...] saacaagaan ahaa maantana geeridaadaan sabab [u] ahay.

Cawralaay dabayshaday dorraade, deri ma geeriyootay,
Daartii aakhiro la hubiyo, degelkii mow fooftay,
Oo ma dardaarankii aad tiara, dacar i leefsiiyey,
Mar haddaad Cawralaay geeriyootay oo aakhirow hoyatay anaad igu dhaaftay jacaylka dhiifihiisii iyo doogihiisii.

Ogoobey jacayl dihashadiis waa dab iyo naare,
Ogoobey waa soo duxanayaan, daqaradiisiiye,
Ogoobey waa doog aan lahayn, daawo iyo baane,
Waxaan ahay Cawralaay, nin ogsoon ama dareen ka qaba inuu sababay naf uu daawadeeda hayey, oo markaas damiirkiisa dab iyo shiil lagu hayo oo ka qoomamoonaaya sagleelihii iyo saymihii dhacay oo uu masuulka ka ahaa.

Ogoobey damiirkiyo qalbigu, way damqanayaane,
Ogoobey dam baan ahay indhaha, daalaadhacaynaaya,
Ogoobey anigaa dulmiyoo, dilay xabiibtaye,

Ogoobey anigaa deldeloo, dembi i haystaaye,
Ogoobey deyn baan qabaa la iga deynayne,

Oo waxa deyradaa dhigayba, waa dib u dhacaygiiye,

Cawralaay haddaan axadho xaajada anoo dembiga iska leh oo aanan cudurdaaranayn, misana waxaa u masuul ahaa saymihii dhacay waxaadan ogayn intaad ifka joogtay oo kaa dahsoonaa. Waxaasoo ahaa wax la yiraahdo aqoondarri oo aniga buro ii ahayd, oo aan ogaa [...] xaasnidaada helay. Waxaan maalintaas [...] inaanay doqonniimo iyo dullimimo kale jirin [...] aqoondarri ahayn.

Cawralaay ninkaan deelka, iyo daalka kala soocin,

In kastuu dircoon yahay, haddana doqonnimow dhowe,

Ogoobey aqoondarridu, waa dulliyo leellele,

Waa darxumo iyo xoog ninkay, dacalka saartaaye,

Waa danqaare waaweyne, haddaan laga digtoonaanin,

Ogoobey daacuunkiyo ka daran, dabargo'iisiiye, Sidaad ogsoon tahay, waxaad Taleex iigu soo dirtay xaashi jacayloo qaaya leh, oo aanay murtidii ku qorrayd macaankeedii iyo miraheedii innaba wax la quuro ahayn. Xaashidaasi waxay igu taftaaftay jacayl iyo muxibbo iyo kalgacal aanan hore kuugu hayn. Waxse nasiibdarri ahayd Cawralaay, aqoondarridayda aawadeed inaan akhrisan waayey xaashidii oo aan markaas u dhiibey niman aanu deris cusub ahayn oo aan keen isla doonayn. Waxayna xogtaydii la

ogaadey i geyeysiisey in bari guntiis la iga tuuryeeyo meeshaan Xiis iyo meeshaad degganayd ka soo beegi lahaa.

Bari markaan tegeyna duullimaadkii Darawiishtu Ingiriiska ku kicinaysey baan qayb weyn ka qaatay, hase ahaatee intaanan xeeb iyo doonyihii wax ka qabsan ayaa lay dhaawacay oo mayd ahaan la iiga tegey. Muddo dheerna oo aan ka soo geyoon waayey waxaan ku noolaa cidla ciirsila, oo calafkaygu iyo cuntadaydu ahaayeen caleenta iyo miraha Caleed. Waxaana wheel ii ahaa habar dugaag oo dhan, habaar qabaha shabeelna habeen buu i miroo haaro iga jeexay anoo tii Ilaah jooga oo bawda ka jaban. Si kastaba ha ahaatee, wax kastana aan la kulmee Ilaah iga soo badbaadi dhibahaas i helay, laakiinse waxaan uga jeedaa oo ay sabab u yihiin Cawralaay dib u dhicii aan dib kaaga dhacay oo ku soo g[…] taan aroos aadan raalli ka ahayn laguu hoyn […]

Cawralaay wey qoommamiyo ciil aanan ka […] rayn inaad jacaylkayga dartiis u geeriyooto.

Warqaaddii daboollayd, markii daaha laga qaaday,
Oo dareenku galay uumiyaha, duq iyo waayeelka,
Ogoobey dul iyo laga tuur, deliya dhaadheere,
Daraawiishta heegani, markay bari duleeydaysey,
Hadaan dayr la ii dhigin, ama dabin la ii qoolin,
Ogoobey daryeel iyo aroos, iyo dereg ma weydeene,
In kastaan dagaal iyo ku jirey, dullan iyo weerar,
In kastay i dershayn, kuwaan deris wadaageyney,
Ogoobey anigaa dayacay, dahab la mooddiiye,
Wixiise daayinkay qoray ayaan, abid ku deyneyne,
Nin Darwiisha waa lagu yaqaan, dirirta gaalaade,
U daryeel dalkaagii hadday, daano iga gaartey,

Duur waxaan ku noolaa beryoo, debedda meeraayey,
Wixii aan caleen daaqayeyoo, doogga guranaayey,
Bowdada waxaan duubayayoo, keli is daaweeyey,

Dabaysha iyo fooraha waxaan, degel madoobaadey,
Wixii aan atoor dilanayoo, dabin u tuuryeeyey,
Wixii aan dab waayayoo la baxay, madag intaan doontay,
Wixii aan biyaha doonayoo, oon i dili gaarey,

Derbi dhagax waxaan xaartayoo, keli is duubaayey,
Dabaxiir shabeel ahi wuxuu igu dul meeraayey,
Denbi kuma lahayn Cawralaay, dib u dhacaygiiye,

Ogoobey Cawralaay, in kastoo hadda adiga iilka laguu hooyey, inaanu jacaylkii ku helay madi ahaaneynin [...] eebayo diifihiisi iyo hiirtaanyooyinkiisii [...] gaba yaabin inaan muddo dheer ifka kaaga [...]

Ogoobey haddii diririku dhaco, dayaxu gaadowye,
Ogoobey haddaan daaqu bixin, duunyo la cayrowye,
Ogoobey waxaan ka danbayn, laba diraacoode,

Afartaasi waa iga dubnixid, dharigu hayn waayey,
Oo aan deegaye gacaladay, ugu baroordiiqay,
Afar kalena waa iga duce, balaan daliileeyo, ***

**Cawralaay, samadoo onkodaysiyo salaanbeyda hilaaciyo sibbaakhayli la moodyey, Soodhowaadka waagiyo qoraxdoo soo bixi doonta sagaalkeeda lahayday, Suuge iyo Manaayoo sarmeweydo ku hoortay iyo saxaansaxada uduggeeda lahayday, Sanqaroorka qoraa iyo suunniya biciida lahayday, Siijeedkii dhisnaa iyo soojeedkii qummanaa iyo shabeelka socodkiisa lahayday, Sinnaanta Maraagiyo dhererka Siiqa lahaydey Soogaanta darmaanoo gu'sooraha daaqday sideeda guudku saynax ahaayey, Gudguduudka, Sagaaro soohdintaa sararteeda midabkeedu sansaanyey Sida Weylasubkana subaxdii wirwiraaya Soomaali hablaheedu qurux baey ka sinmaane sedbursiiyo lahayday, Quruxdeedu sugnayday, siraadkii indhahaygow, Si**

**wanaagsan u seexo, oo malaa'igtii safsafnayd iyo sallallahu rasuulkii ku sagootiye hee dheh.**

**Cawralaay marna saacaaga ahaa, marna sababtaada ahaa, marna saacaaga ahaayoo markii aad saxariirtay oo aan sacabbada kugu qaaday, markaas saacaaga ahaa, marna sababtaada ahaayoo, godkanaad silic jiiftid anigaa sababtiisa ahaa, oo waa sed Eebbe qoree iga saamax ahow, oo ducadayduna waaye.**

# DHAMAAD

Somali Library

Buugaan iyo Buugaag kale ee
ku qoran Luqadaada Hooyo ee **Af-Soomaaliga**
waxaad ka heleysaa

Somali Library

Fadlan Booqo Boga Telegram-ka
https://t.me/Somalilibrary

liibaanwaasuge